MAJALADDA MARAG

Cadadka 11-aad | Feb 2026

# ABAARAHA SOO NOQNOQDA: DHIBAATO CIMILO KEENTAY MISE FASHIL DOWLADEED?

Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)

Bogga: 4



Xigashada Sawirka: Saed Faisel

MAJALADDA MARAG

# Qorayaasha Majaladda




Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)
Abaaraha Soo Noqnoqda: Dhibaato Cimilo Keentay Mise Fashil Dowladeed? 4





Dr. Guuleed Saalax Barre
Fahamka Federaalka: Qeexid, Taariikh iyo Muhiimaddiisa Dowlad-dhiska 7





Dr. Cabdiraxmaan baadiyow
Qodobbo Fure u ah Fahamka Taariikhda Soomaaliya 10





Dr. Maxamuud Cabdirraxmaan
AQOONSIGA ISRAA'IIL EE SOMALILAND IYO JUQRAAFI-SIYAASADEEDKA GEESKA AFRIKA 13





Saki Rabiica
Hannaanka Doorasho ee Dalka: Akhrin Xaaladeed iyo Xulashooyin Siyaasadeed 20





Maxamed Xasan Cirro
Jigjiga, Daahfurka Xarunta Dalxiiska iyo Dareenka qarsoon 25





Bashiir Suulay
Kobcinta Kaabayaasha Dhaqaalaha iyo Dhisidda Aadanaha: Kee Mudnaanta Leh? 28





Axmed Siciid Nuur
Puntland: Qorshaha Horumarinta Afraad ee 2026–2029 muxuu ku salaysan yahay — kaalmo dibadeed mise isku-tashi bulsho? 27





Dr. Maxamed Cali Faarax
Midnimada ummadda Soomaaliyeed: Tiirka karaamada, iyo mustaqbalka Qaranka 35





Cabdiraxmaan Shiikhdoon
MAXAA SABABAY SOO KABASHO LA' AANTA QARANKII SOOMAALIYEED EE KUFAY OO KALA YAACAY? 39





Maxamuud Cali Aadan (Hoorri)
MAXAAN GALALKA DUUGAA! 43

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno cadadka 11-aad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Akhristayaashu waxay cadadkan ka heli doonaan mowduucyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin khilaafaadka ka taagan doorashooyinka qaranka, xaalada abaarta daran ee jirta, aqoonsiga Somaliland iyo juqraafi-siyaasadeedka Geeska Afrika, taxanaha Dal iyo Dad, iyo qormooyin kale.

**Cabdi Cumar Bile**

Tifatiraha Guud

# ABAARAHA SOO NOQNOQDA: DHIBAATO CIMILO KEENTAY MISE FASHIL DOWLADEED?



Cabdullaahi Cabdi
(Cabdullaahi Dheere)




**Xigashada Sawirka**: Saed Faisel

# HORDHAC

Abaaraha soo noqnoqda ayaa noqday caqabad joogto ah oo saameyn qoto dheer ku leh nolosha bulshooyinka ku nool dalalka dhaca dhulalka qallalan, gaar ahaan kuwa ku tiirsan roobka sida xoolo-dhaqatada iyo beeralayda. Badanaa abaaraha waxaa si fudud loogu sababeeyaa isbeddelka cimilada, roob yaraanta, iyo kulaylka sii kordhaya ee dunida. Hase yeeshee, marka si qoto dheer loo falanqeeyo, waxaa soo baxaysa su'aal muhiim ah: abaartu ma tahay masiibo cimilo ka dhalata oo keliya, mise waa fashil dowladnimo oo soo noqnoqda?

# SAAMEYNTA ISBEDDELKA CIMILADA

Dhanka cimilada, lama inkiri karo in isbeddelka cimiladu kordhiyay soo noqnoqoshada abaaraha. Roobabka oo aan joogto ahayn, xilliyada roobka oo gaaban, iyo heerkulka oo sare u kaca ayaa si toos ah u saameeya biyaha, daaqa, iyo wax-soo-saarka beeraha. Bulshooyinka ku nool dhulka qallalan—roobka yar—ayaa taariikh ahaan la qabsaday nolol ku tiirsan roobka, balse isbeddelka cimiladu wuxuu hoos u dhigay awooddii la-qabsigaas. Sidaas darteed, cimilo ahaan abaartu waa arrin dhab ah oo saameyn muuqata leh.

Si kastaba ha ahaatee, daraasaddo iyo falanqaynta aqooneed ee casriga ah—gaar ahaan tan uu hormuudka ka yahay Amartya Sen—waxay muujinaysaa in abaar iyo macaluul aysan si toos ah uga dhalan roob la'aan oo keliya. Amartya Sen wuxuu ku guuleystay Abaalmarinta Nobel ee cilmiga dhaqaalaha sannadkii 1998. Wuxuu buuggiisa Entitlement Theory and the Political Economy of Famine (1981) ku qeexay Aragtida Xuquuqda iyo Dhaqaalaha Siyaasadda ee Macaluusha, isagoo ku dooday in macaluushu ay dhacdo marka dadku lumiyaan awooddii iyo xuquuqdii (entitlements) ay ku heli lahaayeen cunto, biyo, iyo nolol—xitaa haddii kheyraadkaasi guud ahaan dalka ka jiro. Sidaas awgeed, dhibaatadu inta badan waa fashil nidaam siyaasadeed, dhaqaale, iyo hay'adeed, ee ma aha roob la'aan ama cunto-yaraan toos ah.

# DOORKA DOWLADAHA IYO FASHILKA HAY'ADEED

Dunida horumarsan, dowladuhu waxay dhisaan hay'ado u gaar ah oo saadaaliya, la socda, isla markaasna qiimeeya abaaraha, iyaga oo adeegsada calaamadaha hore ee digniinta abaaraha (Early Drought Warning Metrics) si ay u ogaadaan halista abaarta ugana hortagaan in ay isu beddelaan macaluul iyo gaajo. Tusmooyinkaani (matrix) waxay cabbiraan xaaladaha cimilada sida celceliska roobabka, kulaylka, iyo qoyaanka dhulka, sidoo kale waxay qiimeeyaan xaaladda nabaad-guurka dhirta iyo daaqa, heer wabiyada, kaydka biyaha, iyo xaaladda bulshada ee nugul. Cabbiraadahan waxaa ka mid ah tusayaasha qoyaanka dhulka (Soil Moisture Index), calaamadaha cagaarnaanta dhirta (NDVI – Normalized Difference Vegetation Index), sicirka suuqyada cuntada iyo xoolaha (Market Prices), heerarka nafaqo-darrada (Nutrition Rates), iyo guuritaanka bulshooyinka ku tiirsan xoolo-dhaqato (Population Displacement). Marka xogtan la isku geeyo, waxay dawladaha siinaysaa awood ay ku fahmaan baahida dhabta ah ee bulshada, si ay uga hortagaan macaluusha ka hor inta aysan dhicin, taasoo xoojinaysa doorka dowladnimada wax-ku-oolka ah isla markaana yareysa nuglaanshaha bulshada.

Hayeeshee, Soomaaliya iyo guud ahaan Geeska Afrika kama jiraan hay'ado si buuxda u shaqeeya oo saadaaliya, la socda, qiimeeya abaaraha, kadibna soo saara digniin waqtigeeda ku haboon Drought Early Warning Systems (DEWS), taasoo ka dhigan in uusan jirin qorshe waara oo ka hortag ah oo ku saabsan abaaraha. Sidaas darteed, bulshooyinka ku tiirsan roobka iyo xoolo-dhaqatada waxay si joogto ah u la kulmaan halista abaaraha, taasoo keenta soo noqnoqoshada abaaraha iyo saameynta ba'an ee macaluulsha.

Dowlad shaqaynaysa waxay awood u leedahay in ay abaarta ka hortagto ka hor inta aysan isu beddelin masiibo bani'aadannimo. Waxay dhisi kartaa kaabayaal biyo sida biyo-xireenno, ceelal waaweyn, iyo nidaamyo kaydin roob. Waxay dejin kartaa istaraatijiyad qaran oo ku saabsan maaraynta daaqa, dhaq-dhaqaaqa xoolo-dhaqatada, iyo taageeridda wax-soo-saarka beeraha. Sidoo kale, dowladdu waxay dhisi kartaa nidaam digniin hore (Early Warning System) oo saadaaliya abaaraha, kana jawaaba waqtigooda.

Halkan waxaa si cad uga dhex muuqda isku-xirka habka awooddaha (Capability Approach Theory) ee Amartya Sen: dowlad wax-ku-ool ah waa inay ilaalisaa awoodaha aasaasiga ah (capabilities) ee muwaadiniinta—sida helitaanka cunto, biyo, shaqo, iyo ammaan. Marka awoodahan la wiiqo, abaartu waxay noqotaa macaluul, xitaa haddii kheyraadku jiro. Dhinaca kale, marka dowladnimadu daciif tahay ama gebi ahaanba maqnaato, abaartu waxay noqotaa mid halis ah. Khilaafaadka biyaha iyo daaqa lama xalliyo, suuqyadu way fashilmaan, xooluhuna qiimo ayay beelaan. Xaaladdan, xoolo-dhaqato ama beeraley ayaa gaajo u dhiman kara xilli cunto ama xoolo ay wali jiraan, sababtoo ah ma haystaan awooddii ay ku heli lahaayeen, taasoo ah tusaale cad oo muujinaya fashil xuquuqeed (entitlement failure).

## KAALINTA WARBAAHINTA IYO NIDAAMKA DIMUQRAADIYADDA

Intaa waxaa dheer, warbaahin xor ah iyo isla-xisaabtan dimuqraadi ah ayaa door weyn ka ciyaara ka hortagga masiibooyinka abaarta. Warbaahinta xorta ah waxay soo bandhigtaa xaaladaha degdegga ah, waxayna ku cadaadisaa dowladaha inay falceliyaan. Taariikhda foosha xun ee wixii abaaro ama macaluul adduunka ka dhacay—macaluul la xusi karo—weligeed kamay dhicin waddan madax-bannaan, dimuqraadi ah oo leh saxaafad xor ah. Sida uu Amartya Sen uu cod dheer ku sheegay.

***"In the terrible history of famines in the world, no substantial famine has ever occurred in any independent and democratic country with a relatively free press."***

Taas macnaheedu waa in marka codka bulshada la maqlo, xogtuna ay noqoto mid daahfuran, abaartu aysan si fudud ugu beddelmin musiibo qaran. Dimuqraadiyaddu waxay abuurtaa cadaadis siyaasadeed oo qasab ka dhigaya in dowladdu wax ka qabato dhibaatada waqtigeeda.

## GUNAANAD

Abaaraha soo noqnoqda waa isku-dar ka dhasha dhibaato cimilo iyo fashil masuuliyadii dowladnimo, balse masiibada bani'aadannimo ee ka dhalata inta badan waa mid dowladdu sabab u tahay. Roob la'aanta keligeed ma dhaliso macaluul; waxa macaluusha keena waa awood-darrada nidaamka siyaasadeed ee ku guul-darraysata maaraynta kheyraadka jira iyo ilaalinta xuquuqda bulshada. Sidaas awgeed, xalalka waara ee abaaraha kuma eka sugidda roobka, balse waxay ku tiirsanyihiin dhisidda dowlad karti leh, dejinta istaraatijiyad fog oo maarayn kheyraad, iyo nidaam ku dhisan caddaalad, daahfurnaan iyo isla-xisaabtan. Sidaa darteed, inkastoo abaaraha soo noqnoqda ay yihiin dhibaato cimilo, haddana musiibada bani'aadannimo ee ka dhalata inta badan waa natiijo ka timaadda fashilka dowladnimo."

**W/Q:** Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)



**Xaquuqda Sawirka: Saed Feisal**

# FAHAMKA FEDERAALKA:

## QEEXID, TAARIIKH IYO MUHIIMADDIISA DOWLAD-DHISKA



Dr. Guuleed Saalax Barre




**Xigashada Sawirka**: AI

Federaalku ma aha eray siyaasadeed oo keliya, balse waa nidaam dowladnimo oo qoto dheer, xambaarsanna falsafad ku dhisan wadaagis awood, kala duwanaansho la is aqbalay, iyo midnimo la ilaalinayo. Dalal badan oo dunida ah—gaar ahaan kuwa ka soo kabanaya colaado iyo burbur dowladeed—ayaa Federaalka u arkay hab macquul ah oo lagu maareeyo kala duwanaanshaha bulshada, laguna dhiso dowladnimo loo wada dhanyahay. Si kastaba ha ahaatee, fahamka Federaalku weli waa mid aad u xaddidan, gaar ahaan marka laga hadlayo micnihiisa dhabta ah, ujeeddooyinkiisa, iyo shuruudaha loogu hirgelin karo si waxtar leh.

Erayga "Federal" asal ahaan wuxuu ka yimid Af-Laatiin, foedus, oo micnihiisu yahay heshiis, axdi ama ballan. Taasi waxay muujinaysaa in Federaalku yahay nidaam ku dhisan is-aqbal, is-ixtiraam iyo wada shaqayn. Sida ay qabaan aqoonyahannada Federaalka, nidaamkani wuxuu awoodda dowladeed u kala qaybiyaa labo heer ama ka badan, badanaa heer qaran iyo heer gobol, iyadoo mid walba uu leeyahay awoodo dastuuri ah oo u gaar ah. Sidaas darteed, Federaalku ma ahan kala-go' ama burbur dowladeed, balse waa qaab awoodda loo wadaago si looga fogaado ku takrifal, laguna dhowro danaha kala duwan ee bulshada.

Falsafadda Federaalka waxay ku dhisantahay laba tiir oo is-dheellitiraya: midnimo iyo kala duwanaansho. Midnimadu waxay xaqiijisaa jiritaanka qaran mideysan oo leh aragti guud, halka kala duwanaanshuhu uu aqoonsanayo xaqqa ay leeyihiin bulshooyinka, gobollada ama deegaanadu inay yeeshaan maamul u dhow baahidooda, dhaqankooda iyo duruufahooda gaarka ah. Federaalka wuxuu ka hortagayaa hal-gacan ku haynta awoodda, wuxuuna abuuraa nidaam hubin iyo isu dheellitir ah (checks and balances) oo ka hortaga kelitalisnimo iyo takoor.

Federaalku hal qaab oo keliya ma laha, balse wuxuu u kala baxaa noocyo kala duwan oo ay dalalku u qaabeeyaan duruufahooda taariikheed, bulsho iyo siyaasadeed. Waxaa jira Federaal isu-eg (symmetrical), halkaas oo dhammaan dowlad-goboleedyadu ay leeyihiin awoodo iyo xuquuq isku mid ah, iyo Federaal aan isu-ekayn (asymmetrical), oo dowlad-goboleedyo gaar ah la siiyo awoodo dheeraad ah sababo la xiriira taariikh, aqoonsi ama xaalado gaar ah.

Sidoo kale, qaar ka mid ah Federaalku waxay ku dhisanyihiin aqoonsi bulsho ama qowmiyadeed, halka kuwo kalena ku dhisanyihiin qaybin juqraafi iyo maamul oo aan si toos ah ula xiriirin aqoonsi. Dhanka habka wadashaqaynta, waxaa jira Federaal tartan ku dhisan (competitive) iyo Federaal wada-shaqayn ku dhisan (cooperative). Fahamka nooca Federaalka ee la qaadanayo waa arrin aasaasi ah, maadaama caddayn la'aanta noocu ay si toos ah u dhalin karto khilaaf siyaasadeed, is-jiidjiid awoodeed iyo fashil ku yimaadda hirgelinta nidaamka.

Taariikh ahaan, Federaalka ma aha fikrad cusub. Xittaa ka hor aasaaskii dowladaha casriga ah, bulshooyin kala duwan ayaa sameysan jiray isbahaysiyo iyo habab awood-wadaag ah si ay uga hortagaan khataro dibadeed ama u maareeyaan arrimo wadajir ah oo muhiim u ah, sida amniga iyo ganacsiga. Federaalka casriga ah se wuxuu si dhab ah u hanaqaaday dhammaadkii qarnigii 18-aad, gaar ahaan markii Maraykanku hirgeliyay nidaam awoodda si cad ugu kala qaybinaya dowlad dhexe iyo dowlad-goboleedyo. Tan iyo markaas, dalal badan oo kala dhaqan, kala af, kala diin, iyo kala taariikh ah ayaa qaatay nidaamka Federaalka, mid walbana u qaabeeyay duruufihiisa gaarka ah.

Maanta, dunida waxaa ka jira in ka badan 25 dal oo si rasmi ah u qaatay nidaamka Federaalka, halka dalal kale ay ku dhaqmaan nidaamyo aad ugu dhow Federaalka ama awood-daadejin ballaaran. Dalalkan Federaalka ah waxaa ka mid ah kuwo horumaray sida Maraykanka, Jarmalka iyo Kanada, kuwo soo koraya sida Brazil iyo Hindiya, iyo kuwo kasoo kabanaya colaado sida Ciraaq iyo Soomaaliya.

Waxaa la qiyaasaa in ku dhowaad 40% bulshada caalamka ay ku nool yihiin dalal Federaal ah. Marka lagu daro dalalka leh nidaamyo awood-daadejin ballaaran, boqolleydaasi waxay ka badan tahay 70%, taas oo muujinaysa in Federaalku uusan ahayn nidaam xaddidan ama gaar u ah dalal kooban, balse uu yahay nidaam dowladnimo oo si ballaaran caalamka looga aqbalay.

Mid ka mid ah qodobada ugu muhiimsan ee lagu garto Federaalka waa wadaagga madax-bannaanida (shared sovereignty). Federaalku kuma dhisna in awoodda oo dhan ay gacanta u gasho dowlad dhexe, balse wuxuu aqoonsanyahay in dowlad-goboleedyadu ay leeyihiin awoodo sharci ah oo aan looga qaadi karin si aan sharci ahayn. Sidoo kale, Federaalku wuxuu u baahanyahay kala caddayn awoodeed: awoodaha ay leedahay dowladda dhexe, awoodaha ay leeyihiin dowlad-goboleedyadu, iyo awoodaha wadaagga ah. Haddii kala caddayntaas la waayo, nidaamku wuxuu u nuglaadaa khilaaf joogto ah iyo is-jiidjiid siyaasadeed.

Arrin kale oo laf-dhabar u ah Federaalka waa xiriirka ka dhexeeya heerarka dowladeed (intergovernmental relations). Federaalka guuleysta ma aha mid ku dhisan amar iyo cabburin, balse waa mid ku dhisan wadatashi,

wada shaqayn iyo hannaan cad oo lagu xalliyo khilaafaadka. Dalalka Federaalka ah ee horumaray waxay sameysteen goleyaal iyo habraacyo rasmi ah oo fududeeya wada shaqaynta heerarka dowladeed, isla markaana ka hortaga isku dhac joogto ah.

Marka la eego dalalka ka soo kabanaya colaad iyo burbur dowladeed, Federaalka waxaa loo adeegsadaa hannaan nabad-dhis iyo dowlad-dhis. Dalalkaas badanaa waxay la daalaa dhacaan kala qoqob bulsho, kalsooni darro, iyo hay'ado jilicsan. Federaalku wuxuu u fududeeyaa bulshooyinka kala duwan fursad ay ku dareemaan lahaansho iyo ka-qaybgal siyaasadeed, halkii ay ka dareemi lahaayeen in awoodda lagu koobay hal meel ama hal koox. Si kastaba ha ahaatee, Federaalka ma ahan dawo mucjiso ah, haddii hay'adaha dowladeed jilicsanyihiin, haddii dastuurku caddayn waayo nooca Federaal, ama haddii hoggaan masuul ah la waayo, Federaalku wuxuu isu beddeli karaa il khilaaf iyo xasillooni darro.

Xaaladda Soomaaliya, Federaalku wuxuu ka dhashay duruufo gaar ah oo la xiriira burburkii dowladnimada 1991, kalsooni darradii ka dhalatay nidaamkii dowladda dhexe ee awoodda isku koobay, iyo baahida loo qabo hannaan dib u dhisa wada noolaanshaha bulshada. Go'aankii Soomaaliya ku qaadatay nidaamka Federaalka sannadkii 2004 wuxuu ahaa isku day lagu maareynayo kala qoqobka siyaasadeed, cabashooyinka taariikhiga ah ee ku saabsan awood-qaybsiga, iyo baahida loo qabo in dowladnimada dib loogu dhiso qaab ay bulshada Soomaaliyeed ku dareemayaan lahaansho iyo ka-qaybgal.


Si kastaba ha ahaatee, hirgelinta Federaalka Soomaaliya waxay la kulantay caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin faham la'aanta nidaamka, hay'ado jilicsan, muran ku saabsan awoodaha iyo kheyraadka, iyo caddayn la'aanta nooca Federaalka la qaadanayo. Taasi waxay muujinaysaa in caqabadda ugu weyn ee Federaalka Soomaaliya aysan ahayn mabda'a laftiisa, balse ay tahay fahamka, hirgelinta, iyo hoggaanka nidaamka.

Gabagabadii, fahamka Federaalku waa tallaabada ugu horreysa ee lagu dhisi karo nidaam dowladeed oo shaqeeya. Federaalku ma ahan ujeed gaar ah laf-ahaantiisa, balse waa hab lagu gaaro nabad, cadaalad, ka-qaybgal siyaasadeed oo ballaaran iyo dowladnimo waarta. Dal kasta oo qaata Federaalka waa inuu marka hore fahmaa falsafaddiisa, taariikhdiisa, iyo shuruudaha uu ku guuleysan karo. Haddii aan la helin faham qoto dheer, Federaalku wuxuu noqon karaa magac keliya, balse marka si cilmi, sharci iyo siyaasad ah loo fahmo, wuxuu noqon karaa tiir muhiim u ah dowlad-dhiska dalalka khilaafku ragaadiyey.

## TAXANAHA: DAL IYO DAD

Dal iyo Dad waa taxane maqaallo joogto ah oo bil walba ku soo bixi doona Majalladda Marag, kaas oo si qoto dheer u falanqeynaya mawduucyo la xiriira dawladnimada, federaalka iyo taariikhda Soomaaliya. Taxanahani wuxuu isku xirayaa waayo-aragnimo taariikheed, aragti cilmiyeed iyo duruufaha siyaasadeed ee taagan, isaga oo ujeedkiisu yahay in la helo faham qoto dheer oo ka turjumaya casharrada taariikhda, dhismaha dawladnimo casri ah, iyo kaalinta muwaadinka ee masiirka qaranka. Sidoo kale, Dal iyo Dad wuxuu dhiirrigelinayaa dood aqooneed, wacyigelin bulsho iyo kobcinta aragti fog oo ku wajahan mustaqbalka dalka.

**W/Q:** Dr. Guuleed Saalax Barre




# QODOBBO FURE U AH FAHAMKA TAARIIKHDA SOOMAALIYA



Dr. Cabduraxman Baadiyow

**Xigashada Sawirka**: AI



Maqaalkani wuxuu bixinayaa dulmar ku saabsan qodobbo muhiim ah oo qeexaya socodka taariikheed ee horumarka Soomaaliya. Qodobadaas waxaa ka mid ah taariikhda fog ee hodanka ah ee Soomaaliya, shabakadaha ganacsi ee badaha, iyo saameynta weyn ee Islaamku ku yeeshay bulshada Soomaaliyeed. Waxa kale oo uu falanqeynayaa qalalaasihii uu sababay gumaysigu, doorkii wadaninimada Soomaaliyeed ku lahayd dhismaha dawlad casri ah, burburkii dawladda iyo dadaalladii dib loogu dhisay sannadkii 2000, iyadoo lagu saleeyay awood-qaybsi beeleed iyo qaadashada Islaamka. Sidoo kale, wuxuu ka hadlayaa caqabadaha dhaqan-siyaasadeed ee ku xeeran dib-u-dhiska dawladnimada federaalka, soo ifbaxa qabyaaladda siyaasadaysan iyo xagjirnimada sida Al-Shabaab. Waxa kale oo uu taabanayaa siyaasadaha dhowaanahan ee Itoobiya oo ku wajahan Somaliland iyo saamayntooda ku aaddan madax-bannaanida Soomaaliya. Maqaalku wuxuu ku soo gabagabeynayaa adkeysiga bulshada Soomaaliyeed inkastoo ay jirto daciifnimo dowladeed iyo cadaadisyo dibadeed, isagoo bixinaya faham guud oo ku saabsan socdaalka taariikheed ee murugsan iyo arrimaha maanta taagan.

## 1. ILBAXNIMADII HORE EE SOOMAALIYA

Qodobka koowaad wuxuu iftiiminayaa ilbaxnimada qadiimiga ah ee Soomaaliya oo soo tixnayd kumannaan sano. Caddeymo qadiimi ah ayaa muujinaya in bulshooyin horumarsan ay ka hanaqaadeen dhulkan muddo dheer ka hor taariikhda casriga ah. Bulshooyinkaas hore waxay caan ku ahaayeen xirfaddooda badmareenimo iyo ganacsigooda ballaaran ee ay la lahaayeen Masar qadiim ah, Faaris, Hindiya iyo Shiinaha. Soomaaliya waxaa loo aqoonsanaa dhulkii loo yaqaanay "Punt," oo caan ku ahaa dahabka iyo udugga qaaliga ah. Dadka Soomaaliyeed waxay dhiseen dhaqan hodan ah oo ay ka mid yihiin qaab-dhismeedyo gaar ah iyo farsamo gacmeed heer sare ah. Hiddahaas qadiimiga ahi weli wuxuu ka muuqdaa farshaxanka, dhaqanka iyo qaab-dhismeedka bulsho ee maanta jira. Qodobkaan wuxuu ka hor imaanayaa aragtida sheegaysa in Soomaaliya ahayd oo keliya beelo kala daadsan oo aan lahayn midnimo taariikheed, isla markaana gumaysigu keligii aasaasay dawladnimada Soomaaliyeed.

## 2. QAADASHADA ISLAAMKA IYO SAAMAYNTIISA

Qodobka labaad wuxuu muujinayaa qodobka koowaad ee qaabeeyay bulshada Soomaaliyeed: saameynta qotoda dheer ee Islaamka. Islaamku wuxuu Soomaaliya soo gaaray qarnigii 7aad iyada oo ay keeneen ganacsato iyo culimo Carbeed, wuxuuna si buuxda ugu dhex milmay nolosha bulshada. Wuxuu saameeyay dhaqanka, nidaamka bulshada, siyaasadda, farshaxanka iyo qaab-dhismeedka. Islaamku wuxuu mideeyay beelaha kala duwan isagoo siinaya qaab diimeed wadaag ah. Xilligii dhexe, fiditaanka Islaamku wuxuu horseeday soo ifbaxa dawladihii Soomaaliyeed sida Dawladdii Ajuuraan iyo Dawladdii Cadal, oo markii dambe noqday dawlad Islaami ah oo qoomiyado kala duwan ka koobnayd, balse Soomaalidu door weyn ku lahaayeen. Si kastaba ha ahaatee, dawladahaasi waxay hoos u dhaceen qarnigii 17aad, taasoo keentay kala-daadasho ku salaysan beelo. Daciifnimadaas oo laba qarni socotay, iyo koritaanka quwadaha Yurub, waxay sahashay in dhulka Soomaaliyeed la kala qaybiyo oo la gumaysto. Tani waxay muujinaysaa in dawlad Soomaaliyeed oo xooggan ay ka hortagi kartay khataraha dibadeed, sida Boortaqiiska iyo buuraleyda Itoobiya; balse marka ay burburaan oo kala daadsanaadaan, ay fududaato in quwado shisheeye soo fara geliyaan.

## 3. FARAGELINTA GUMEYSTAHA IYO SAAMEYNTA

Qodobkaan wuxuu tilmaamayaa qodobka labaad ee qaabeeyay bulshada: gumaysiga. Dabayaaqadii qarnigii 19aad, Soomaaliya waxaa kala qabsaday Ingiriis, Talyaani, Faransiis iyo Boqortooyadii Itoobiya. Gumaysigu wuxuu keenay xuduudo cusub, nidaamyo dhaqaale iyo waxbarasho, kuwaas oo wax weyn ka beddelay bulshada. Wuxuu wiiqay qaab-dhismeedkii dhaqanka iyo shareecada Islaamka, isagoo keenay nidaam qaanuun oo reer galbeed ah. Si kastaba, inkastoo gumaysigu saameyn xooggan ku yeeshay haldoorka siyaasadeed iyo qaabka dawlad-dhisidda, haddana si qoto dheer uguma milmin bulshada Soomaaliyeed.

## 4. SOO IFBAXA WADDANIYADDA IYO SAAMAYNTEEDA

Qodobkaan wuxuu diiradda saarayaa wadaninimada oo noqotay qodobka saddexaad ee qaabeeyay bulshada, laguna dhisay dawlad casri ah. Dhaqdhaqaaqyadii wadaninimo waxay ku salaysnaayeen dhaqan iyo luqad mideysan, iyagoo doonayay is-xukun iyo midnimo ka sarreysa xuduudihii gumaysiga. Ururro sida SYL ayaa door muhiim ah ka qaatay halganka gobannimo-doonka. Sannadkii 1960-kii, Soomaaliya waxay heshay

xorriyaddeeda, taasoo rumaysay himiladii dawlad mideysan oo madax-bannaan,

## 5. HIRGELINTA WADANINIMADA IYO XIISADAHA KA DHASHAY

Qodobkaan wuxuu ka hadlayaa sida hirgelinta wadaninimada ay u dhalisay xiisado gudaha iyo dibadda ah. Nidaam dowladeed oo dhexe ayaa la doortay, taasoo khilaaf la gashay qaab-dhismeedkii beelaha iyo dhaqanka Islaamka. Sidoo kale, himiladii "Soomaaliweyn" oo ku baaqaysay mideynta dhammaan dhulalka ay Soomaalidu degto waxay abuurtay xiisado deriska xiriir la leh, gaar ahaan Itoobiya iyo Kenya. Dagaalkii 1977–1978 ee Itoobiya lala galay wuxuu dhaawacay himiladii wadaninimo.

## 6. QARAN-BURBURKA IYO DAGAALADDA SOKEEYE

Qodobkaan wuxuu falanqaynayaa koritaankii iyo burburkii dawladda ku dhisnayd wadaninimada. Dhaqan-siyaasadeed ku salaysan eber-isku-gee (zero-sum), kala-qaybsanaan beeleed iyo ku tiirsanaan dibadeed ayaa door weyn ka qaatay burburka. Xukun kali-talisnimo iyo caburin siyaasadeed ayaa sii huriyay khilaafka. Taageerada Itoobiya ee kooxaha mucaaradka hubeysan ayaa sii xoojisay kala-qaybsanaanta, taasoo keentay burburkii 1991-dii iyo dagaallo sokeeye oo muddo dheer socday.

## 7. DIB-U-DHISKA DAWLADDA EE 2000

Qodobkani wuxuu ka hadlayaa fashilka isku dayo badan oo dib-u-heshiisiin ah kadib burburkii 1991 iyo dhismihii dowlad cusub sannadkii 2000 shirkii Jabuuti. Waxaa la qaatay nidaamka awood-qaybsiga 4.5 si loo maareeyo qaab-dhismeedka beelaha, Islaamkana waxaa loo aqoonsaday saldhig sharci iyo mideyn bulsho. Dowladda cusub waxay si dadban uga leexatay himiladii Soomaaliweyn, iyadoo xoogga saartay dib-u-dhiska gudaha, hagaajinta xiriirka deriska—gaar ahaan Itoobiya—iyo ku biirista iskaashi goboleed sida Bulshada Bariga Afrika (EAC).

## 8. CAQABADAHA CUSUB OO SOO IF-BAXAY EE DAWLAD-DHISKA

Qodobkani wuxuu tilmaamayaa caqabadaha cusub ee dowlad-dhiska Soomaaliya, gaar ahaan qabyaaladda ku soo laabatay qaab federaal ah iyo loollanka ka dhasha maamul-goboleedyo beelaysan. Sidoo kale, kooxaha xagjirka ah sida Al-Shabaab ayaa ka faa'iideysta kala-qaybsanaanta si ay u wiiqaan xasilloonida. Intaa waxaa dheer, dhaqan-siyaasadeed ku dhisan eber-isku-geyn (Zero-Sum), musuqmaasuq, iyo faragelin dibadeed ayaa sii adkeeyay xaaladda, taasoo ka dhigaysa dowlad-dhiska mid weli wajahaya caqabado isku dhafan.

## 9. DAMACA ITOOBIYA IYO AQOONSIGA ISRAEL EE SOMALILAND

Qodobkani wuxuu ka hadlayaa walaaca ka dhashay aqoonsi ay Israa'iil siiso Somaliland iyo heshiisyada marin-badeed ee lala galo quwado shisheeye, gaar ahaan Itoobiya. Arrintan waxaa loo arkaa mid taabanaysa madax-bannaanida iyo midnimada dhuleed ee Soomaaliya. Sidoo kale, waxay qayb ka tahay loollan juqraafi-siyaasadeed oo cusub oo ay ku tartamayaan quwado sida Turkiga, Sacuudiga iyo Imaaraadka, kuwaas oo danaynaya istiraatiijiyadda Geeska Afrika iyo Badda Cas. Haddii aan si taxaddar leh loo maareyn, isbeddelladan waxay saameyn ku yeelan karaan xasilloonida gobolka iyo wadajirka Soomaaliya.

Gabagabadii, socdaalka taariikheed ee Soomaaliya wuxuu muujinayaa bulsho leh adkeysi iyo karti ay kaga gudubto marxalado adag oo dawladnimo daciif ah ama burbur ah. Taariikh ahaan, Soomaalidu waxay si joogto ah uga hortageen gumaysi, faragelin dibadeed, iyo duruufo siyaasadeed oo cakiran, iyagoo ilaashaday aqoonsigooda, midnimadooda iyo madax-bannaanidooda. Falanqaynta guud ee qodobadan waxay daaha ka rogaysaa is-dhexgalka caqabadaha gudaha—sida kala-qaybsanaanta iyo dhaqan-siyaasadeedka taban—iyo cadaadisyada dibadeed ee saameeya jihada dalka. Si loo gaaro xasillooni waarta, waxaa lama huraan ah in la xalliyo khilaafaadka gudaha, la xoojiyo maamul wanaagga iyo isla-xisaabtanka, la ilaaliyo madax-bannaanida qaranka, lana kobciyo iskaashiga goboleed. Marka la mideeyo aragti qaran oo wadajir ah lana maareeyo xiriirrada dibadda si xeeladaysan, Soomaaliya waxay dhisi kartaa mustaqbal xasilloon, mideysan oo adkeysi leh.

W/Q: Dr. Cabduraxman Baadiyow

# AQOONSIGA ISRAA'IIL EE SOMALILAND IYO JUQRAAFI-SIYAASADEEDKA GEESKA AFRIKA



Dr. Maxamuud Cabdirraxmaan Hoorri



Xigashada Sawirka: madaxtooyda SL

## HORDHAC GUUD: DHUL-GARIIR JUQRAAFI-SIYAASADEED

Markay taariikhdu ahayd 26-kii Diseembar 2025, waxaa dhacay dhul-gariir siyaasadeed oo aan la mahadin kaas oo mowjado argagax ku abuuray juqraafi-siyaasadeedka Geeska Afrika. Si lama filaan ah Israa'iil ayaa noqotay dalkii ugu horreeyay ee xubin ka ah Qaramada Midoobay oo si rasmi ah u aqoonsada maamulka gooni-u-goosadka ah ee Somaliland. Hargeysa, aqoonsigaan wuxuu u ahaa farxad iyo filanwaa soo afjarta 34 sano oo ay raadinayeen sharciyad caalami ah. Dhanka kale, Muqdisho aqoonsigan wuxuu u ahaa "gardarro bareer ah" oo lagu soo qaaday madaxbannaanideeda iyo midnimada dhuleed ee qaranka Soomaaliya. Gobolka Geeska Africa iyo Adduunka intiisa kale, aqoonsigani wuxuu u furay bog cusub oo khatar badan uuna ka dhalan karo loolan amni ee marin-biyoodka Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed.

Si loo fahmo culayska amni, istaraatijayeed iyo dhaqan-dhaqaale ee uu leeyahay aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland, waxaan isku deyi doonaa in aan qormadan ku lafagurno saamaynta muuqata ee uu ku yeelan karo midnimada iyo qaranimada Soomaaliya, xisaabaadka qabow ee amniga badda, loolanka gobolka, iyo "dagaalka qarsoon" ee hadda bannaanka u soo baxay una dhexeeya quwado kala duwan oo uu hardan hoosaad ka dhexeeyo ayna u cad-cad yihiin Israa'iil, Itoobiya, Yemen, Turkiga, Sacuudi Careebiya, Masar iyo Imaaraadka Carabta iyo awoodo kale oo reer Galbeed ah oo kala taageerada waddamadaas.

Waxaa iyaduna xusid mudan oo aan si gaar ah ugu falanqayn doonnaa qormadaan, saamaynta taban ee aqoonsigani ku yeelan karo Somaliland, marka laga soo tago in ay heshay aqoonsigii ugu horeeyay, jahwareerka siyaasadda dibadda ee Dowladda Federaalka Soomaliya (DFS) iyo saamaynta aqoonsigan ku yeelan karo danaha iyo amniga qaran ee Turkiya iyo Masar. Qormadaan tii ka horraysay waxaan ku faalaynay "Dheesha Juqraafi-Siyaasadeedka iyo Faragelinta Shisheeye" oo aan ku qaadaa dhignay danaha isdiidan ee dowladaha la kala safan DFS iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka (DXF).

Ugu horrayn, aan is waydiinno asbaabta soo dedejisay aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland xillagan ay Somaliland ugu taag iyo tabar daran tahay iyadoo ay ka go'day masaaxo u dhiganta 45% dhulka ay sheeganayso in ay ka taliso (Dowlad-Goboleedka Waqooyi Bari ee Sool iyo Sanaag oo ka tirsan DFS), isla markaasna deganaansho la'aan iyo kacdoon hoos ka huray uu kasoo ifbaxayo gobollada Awdal iyo Saylac ee galbeedka Hargaysa.

## MAXAA KEENAY AQOONSIGA XILLIGAN?

Dowlado badan oo gobolka ah ayay u muuqataa in ay danaynayaan in ay Soomaliya u tahay cumqi istaraatiijayadeed (Strategic Depth) oo aan doonayn in ay marna degto ama ay dib u hanato qaranimadeedii. Aqoonsiga Israa'iil ma ahayn mid ku yimid kalgacal ay u hayaan shacabka Somaliland iyo maamulkiisa ama ku doonayaan in ay geeska kusoo dabaalaan hannaan dimoqraadiyadeed. Israa'iil aqoonsiga Somaliland waxaa la oran karaa in uu yahay fal-celin ka dhalatay cadaadisyo amni oo is-biirsaday iyo dhabar jebin ay la damacsan tahay awoodo Bariga Dhexe oo ay is hayaan sida Turkiga iyo Masar.

Dabayaaqadii 2025, marinka Bab al-Mandeb, oo ah halbowlaha isku xira Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed, wuxuu noqday goob dagaal ama halis geliya isu socodka shidaalka, gaaska iyo maraakiibta isaga goosha caalamka ama ku wajahan Israa'iil. Kooxda Xuutiyiinta ee Yemen, oo taageero ka helaya Iiraan, waxay marinkaas u beddeleen goob gumaad oo lagu beegsado maraakiibta xiriirka la leh Israa'iil looguna hiilinayo shacabka Falastiin ee muddo ka badan 2 sano duqaymo iyo xasuuq arxan darro ah ay ku haysay Israa'iil iyada oo dunida oo dhami wada daawanayaan cid wax ka qabatayna aysan jirin wax aan cambaarayn ahayn. Intii xasuuqaasi socday, Xuutiyiinta Yemen waxay dhowr jeer dhaawacyo iyo weerar ugu gaysteen maraakiib u socotay ama u rarnaa Israa'iil oo marayey Gacanka Cadmeed.

Israa'iil, oo markii hore awooddeeda Badda Cas ay ku koobnayd dekedda Eilat, waxay hadda heshay "goob ilaalo ah (Military Outpost)" ee marinka Bab al-Mandeb iyo Gacanka Cadmeed. Xeebta Somaliland oo dhererkeedu yahay 460 mayl (xuduudi isticmaarka) waxay si toos ah u eegaysaa Yemen. Goob ilaalo oo Israa'iil ka samaysato Berbera, waxay Israa'iil siinaysaa fursad ay ku rakibto qalabka sirdoonka ee elektaroonigga ah (SIGINT), diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, iyo awood ciidan oo badda ah si ay uga hortagaan khatarta Xuutiyiinta intaanay soo bixin.

Intaas waxaa dheer, "Ruuxa Heshiisyada Ibraahim" (Abraham Accords) ayaa isbeddelay oo markii hore ku wajahnaa dowladaha Carabta siiba Khaliijka

iyo Sudan. Israa'iil waxay hadda raadinaysaa isbahaysiyo cusub oo ka tirsan dunida Muslimka kana baxsan Jasiiradda Carabta, kuwaas oo diyaar u ah inay aqoonsi diblomaasiyadeed ku beddeshaan tiknooloojiyada, beeraha, kaalmooyinka amniga iyo in ay Israa'iil ka dhigato goobo ay u adeegsato dagaalkeeda juqraafi-siyaasadeed iyo diblomaasiyadeed ee ku wajahan dowladaha colaaddu ka dhaxayso.

## SAAMAYNTA SHARCIGA IYO MIDNIMADA AFRIKA?

Muddo tobannaan sano ah, beesha caalamku waxay ku dhegganayd siyaasadda "Soomaali-weyn" ama "Midnimada Soomaaliya", iyadoo laga fogaanayay in lagu xad-gudbo mabaadi'da Midowga Afrika (AU) ee ah "lama-taabtaannimada xuduudihii gumeystuhu ka tagay" sida ku cad qodobka 4, faqrada "b" ee xeerka 1964 (Constitutive Act), loona yaqaan "uti possidetis juris". Xilligaas Soomaaliya waxay ahayd hal waddan oo aan kala qaybsanayn; inkasta oo ay weli ku doodaysay gobollada ka maqan ee Ogaden iyo NFD. Mabda'an wuxuu ka hortagayaa in aqoonsiga gobollada ama deegaamada dowladaha Afrika sida Somaliland uu kicin karo mowjado gooni-u-goosad ah oo qaaradda dhan ka qarxa, ayna suurtagal ahayn in la xakameeyo. Waddan kasta oo Afrika ah waxaa ka dhexjira ishaysi qoomayideed ama diineed oo hor kici kara burbur baahsan oo ku yimaada dowladaha isticmaarkii ka dib.

Sidaa si la mid ah, Axdiga dowliga ah ee Qaramada Midoobay (UN Charter), gaar ahaan qodobkiisa 2, faqrada 4, wuxuu qeexaayaa in dhammaan dowladaha xubnaha ka ah Qaramada Midoobay aysan faragelin madaxbanaanida iyo midnimada dhuleed ee waddamada xubnaha ka Qaramada Midoobay si loo suurtageliyo nabad ku wada noolaanshaha. Sidaa darteed, aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland wuxuu si toos ah u jebinayaa ama ugu yahay xad-gudub aan la aqbali karin Axdiga UN iyo sharciga AU, si loo ilaaliyo midnimada dhuleed (territorial integrity) iyo madaxbanaanida qaranimo (national sovereignty) ee Soomaaliya. In Soomaaliya ay gashay xaalad burbur iyo dagaal sokeeye sida dowlado badan oo kale oo dunida ah oo ay ka mid tahay Itoobiya, Libya, Yemen, Liberia ama aysan si buuxda uga wada talin deegamada oo dhan kama dhigna in ay lumisay sharciyadeeda dowladnimo (de jure) iyo madax banaanideeda qaran (national sovereignty).

Jebinta Axdiga UN iyo Sharciga AU ee Israa'iil waxay horseedi kartaa in dowladaha kale, gaar ahaan Itoobiya oo awalba ul booc ah ugu dhutinaysay aqoosniga Somaliland, ay dhabahaas raacaan (domino effect), taasoo daciifinaysa awoodda dowladda federaalka ah ee Muqdisho. Horay Itoobiya waxay isugu dayday, horraankii 2024, in ay maamulka Somaliland la gasho is-afgarad (MoU) ay ku raadinayso marin ay u hesho badda Gacanka Cadmeed oo ay ku bedelato in ay aqoonsato Somaliland. Kacdoon diblomaasiyeed oo ay qaadday dowladda federalka iyo saaxiibadeeda dibada ee taageera sida Turkiya ayaa dhiciseeyey is-afgaradkaas oo taabigeli waayay.

## DOODDA ITOOBIYA IYO SOMALILAND EE GOONI-GOOSADKA

Si ay xujjo ugu hesho aqoonsiga aan la mahadin kana soo horjeeda dhammaan sharciyada caalamka, Axdiga UN iyo sharciga AU, Israa'iil waxay caddayn u soo qaadatay xaalad taariikhi ah oo gaar ah. Waxay ku doodaysaa in bishii Juun 1960-kii, ay Somaliland" heshay madaxbannaani muddo shan maalmood ah, waxaana aqoonsaday 35 dal oo Israa'iil ku jirto ka hor intaysan la midoobin Soomaalida Talyaaniga. Tel Aviv waxay ku doodaysaa in tani aysan ahayn goosasho laga go'ay Soomaaliya, balse ay tahay soo celin dowladnimo hore u jirtay 1960-kii (dissolution not session).

Dooddan ah in aysan goosasho ahayn ee ay tahay soo celin dowladnimo (Israeli narrative) iyo kala gurasho, waxay soo ifbaxday intii Israa'iil aqoonsatay Somaliland. Somaliland waxay horay ugu doodaysay in ay si daacadnimo iyo doonisteeda ah ay ugu biirtay Soomaliyada Koonfureed, haddana ay rabto in ay aayadaheeda ka taliso iyadoo ku sababaynaysa in midowgu uusan u danayn ama loogu bedelay in si gooni ah loo beegsado ama xasuuqa shacabka kasoo jeeda Somaliland, gaar ahaan beesha reer Isxaaq. Eed-sheegadka beesha waxay keentay in ay samaystaan jabhaddii SNM (dhaq-dhaqaaqa qaran ee

Soomaliya) oo hadafkeedu uusan markii hore ahayn in ay goostaan laakiin si la mid ah SSDF ay u ridaan taliskii milatari ee Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre oo markaas waddanka ka talinayey.

1991, nidaamdkii dowladnimo ee ugu horeeyay ee la isku dayay in la yagleelo oo uu hoggaaminayey Cali Mahdi, isla markaasna uu Ra'iisal Wasaare u magacaabay Cumar Cartan Qaalib, ayaa ku amray in ciidamada dowladda ee ku kala sugan goballada Waqooyi, Bari iyo Waamo ay isu kala dhiibaan jabhadihii aaggaas ka dagaalamayey ee SNM, SSDF iyo SPM. Go'aankaas wuxuu keenay in dhammaan xarumihii dowladda iyo xeryihii ciidamada ee gobollaada Waqooyi lasoo faaruqiyo, taladana ay gacanta ku qabato jabhaddii SNM. Shir beeleed lagu qabtay 1991 magaalada Burco ayaa beeluhu badankooda ku heshiiyeen in gooni loo goosto oo laga go'o Soomaaliya inteeda kale.

## SOMALILAND HORAY DOWLAD MA U NOQOTAY?

Inta aan la iswaydiin in 1960 la aqoonsaday Somaliland, su'aashu waxay tahay horta dowlad ma noqotay u baahan in la aqoonsado?

Xogaha kaydka taariikheed ee 1950-1960-kii, waxay muujinayaan in Soomaalida ku midaysnaayeen gobalada uu Ingriiska gumaysanayey ee loo yaqaan Goballada Waqooyi iyo goballada uu Talyaanigu gumaysaney ee loo yaqaanay Goballada Koonfur–la iska kiciyo gumaysiga oo la yeesho hal waddan iyo hal dowlad.

Soomaaliya oo ka kooban labadaas gobal, waxay gashay kafaalada Qaramada Midoobay (UN Trusteeship) taariikhdu markay ahayd April 1, 1950, waxaana lagu ballamay in ay xornimo qaadato July 1, 1960, iyada oo labada gobolba wadajiraan. Waraysi uu siiyay Madaxweyne Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal idaacadda BBC xilli ku aadan April 1960 oo ay xornimada ka harsantahay laba bilood keliya, wuxuu ku sheegay in ay dowladda Ingiriiska ku ballameen in ay xornimada la qaataan walaalahood Koonfureed July 1, 1960. Ururrada u dagaalama xornimada sida SYL waxay ka howlgaleyeen dhammaan gobollada Soomaalida Waqooyi iyo Koonfur.

Dowladda Ingiriiska oo lagu yaqaan dhagarta iyo in ay isku murgiso xuduudaha bulshooyinka ay gumaysato ayaa si aan horay loo qorshayn waxay ka baxday Gobollada Waqooyi shan maalmood ka hor waqtigii lagu ballaamay in xorriyada ay wada qaataan labada gobol ee Waqooyi iyo Koonfur. Muddadaas kooban waxaa Hargaysa looga dabaal degay in gumasyigu ka kacay, waxaa laga taagay callanki Soomaaliyeed ee metalayay midnimada, ma jirin, dowlad gaar ah oo lagu dhawaaqay, ma jirin, dastuur gaar, calan gaar ah, iyo astaan gaar ah oo aan ka ahayn kuwii heshiiska lagu ahaa in lagu midoobo.

Arrinka ah in dowladdo u hambalyeeyeen Golaha Wasiirada (Council of Ministers) oo ah maamul uu dhisay gumaystaha si ay uga xigsadaan maamulidda tooska ah ee shacabka kama dhigna in loo aqoonsaday dowladnimo gaar ah. Waxaa loo hambalyeeyey shacab gumaysi ka kacay. Dabcan, 5 maalmood dowlad laguma dhisi karo, ujeedkuna ma ahayn. Xaqiiqooyinka taariikhda waxay sugayaan in Gobollada Waqooyi (Somaliland) aysan marna noqon dowlad gaar ah ama la aqoonsaday. Dowladnimada Soomaaliya waxay taabbagashay marka labada gobol ay iyagu dowlad ay wada leeyihiin ay wada dhisteen, lagana aqoonsaday Hay'adda Qaramada Midoobay (UN) taariikhdu markay ahayd July 1960.

Mar haddii aysan jirin dowlad si gaar ula midowday dowlad kale ee ay ahaayeen shacab Soomaaliyeed oo laba gumayste kala haystay, maalmo yar ku kala horreeyey in ay xorriyadooda heleen, isla markaasna dhistay dowlad ay u dhanyihiin, waxaa buraya doodda ah in gooni isu taagga Somaliland uu yahay kala gurasho (Dissolution) ee uusan ahayn goosasho (Secession).

## ISBAHAYSIGA TURKIGA, BOQORTOOYADA SACUUDIGA IYO MASAR

Aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland iyo ku dhawaaqida gooni isu taaga Koofurta Yemen ee Golaha Ku-Meelgaarka Koonfurta Yemen (Southern Transitional Council, STC), waxay kiciyeen mowjad falcelin xoog badan oo sababtay in uu abuurmo isbahaysi ka dhexeeya

Turkiga, Boqortooyada Sucuudiga iyo Masar oo dhammaantood u arka in labadaan dhacdo ay halis ku tahay amnigooda qaran iyo amniga Gacanka Cadmeed, Badda Cas iyo Kanaalka Suways iyo weliba danaha istaraatiijiga ah ee Turkiga ee uu ka leeyahay Afrika guud ahaan, gaar ahaan Soomaaliya.

Boqortooyada Sucuudiga waxay u aragtaa in dhacdooyinkani ku yihiin khatar toos ah aminigooda qaran iyo soonka saamayntooda (Sphere of Influence).

Turkiga wuxuu balaayiin doollar ku bixiyay Soomaaliya, isagoo Muqdisho ku leh saldhigga milatari ee ugu weyn ee uu dibadda ku leeyahay (Camp TURKSOM). Israa'iil markay aqoonsatay Somaliland, waxay si toos ah u beegsatay maalgashigaas. Haddii Somaliland noqoto dowlad la aqoonsanyahay oo Israa'iil taageerto, Turkigu wuxuu ku khasbanaan doonaa inuu difaaco dowlad federaal ah oo daciif ah, halka Israa'iil ay la shaqaynayso maamul deggan oo leh marin badda ah.

Qaahira waxay u aragtaa isbahaysiga Israa'iil-Somaliland-Itoobiya mid khatar ku ah amnigooda qaranka. Masar waxay horeyba isku maan-dhaafsanaayeen Itoobiya oo ku saabsan Biyo-xireenka weyn (GERD). Hadda, iyadoo Israa'iil ay saldhig ku yeelanayso Somaliland, Masar waxay dareemaysaa "go'doomin" kaga imanaysa dhinaca koonfureed iyo marin-biyoodka Badda Cas, halka Turkiga ay ku noqonayso dhabar jebin xanuun badan ee heshiisyadeeda difaaca iyo maalgashiga ee ay kula jirto Soomaaliya.

## SAAMAYNTA AMNIGA IYO MARINKA BAB AL-MANDEB

Aqoonsigani wuxuu gabi ahaanba beddelayaa hab-dhaqanka dagaalka (Rules of Engagement) ee Gacanka Cadmeed.

- Beegsi Cusub: Hoggaamiyaha Xuutiyiinta ayaa mar hore caddeeyay in joogitaanka Israa'iil ee Somaliland uu yahay "bartilmaameed ciidan". Tani waxay ka dhigan tahay in dagaalkii Yemen uu u soo gudbi karo dhinaca kale ee xeebta.
- Siyaasadda Mareykanka: Mareykanku wuxuu hadda galay xaalad adag. In kasta oo uu Muqdisho aqoonsanyahay, haddana Pentagon-ka (Wasaaradda Gaashaandhigga) waxay u arkaan Dekedda Berbera mid ka ammaan badan Jabuuti oo Shiinuhu saameyn ku leeyahay. Aqoonsiga Israa'iil wuxuu Mareykanka siinayaa fursad uu kaga faa'iidaysto sirdoonka Israa'iil iyadoo uusan si toos ah u jebin xiriirka Muqdisho.

## CAQABADAHA SOO FOOD SAARAYA SOMALILAND

In kasta oo Hargeysa ay faraxsantahay, aqoonsigani wuxuu wataa khataro waaweyn:

1. Summadda "Zahyooniyadda": Bulsho 100% Muslim ah, xiriirka Israa'iil waa cambaar iyo astaan foolxun oo dhaawacaysa sumcadooda iyo xiriirka ay la yeelan karaan dunida Muslimka intiisa kale, gaar ahaan xilli ay sumcadda Israa'iil ee dunida ay aad ugu dhaawacantay xasuuqa ay ka geysteen Gaza iyo barakicnta ballaaran ee maatada reer Falastiin. Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee hubaysan waxay u adeegsan karaan xiriirkan borobagaandada ah in Hargeysa ay tahay "wakiilka Yuhuudda", taasoo kor u qaadaysa khatarta argagixisada ee gudaha Somaliland.
2. Muranka Qaxootiga Gaza: Wararka sheegaya in aqoonsigan lagu beddeshay in dadka Falastiiniyiinta ah laga soo raro Gaza laguna dejiyo Somaliland ayaa abuuray caro weyn oo dunida Muslimka ah, taasoo Somaliland ka dhigi karta mid ka go'da deriskeeda Carbeed iyo dunida Muslimka intiisa kale.
3. Dhaqaalaha: Somaliland waxay wajhi kartaa cunaqabatayn dhinaca hawada iyo bangiyada ah oo kaga timaada dowladda federaalka, iyo sidoo kale in Turkiga iyo dalalka Carabta ay ka noqdaan maalgashiga ay ka wadeen gobolka. Waxaa iyaduna khatar wayn ah xoolaha ka dhoofi jiray Berbera ee loo dhoofin jiray Sucuudia xilliga Xajka iyo gudashada Xajka oo ay dhici karto in dadka reer Somaliland ay caqabad kala kulmaan.

4. Go'doon Diblomaasiyadeed: Aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland wuxuu sababay in uu caqabad ku noqdo in ay dowlado kale gaar ahaan Midowga Afrika iyo Dunida Muslimka ay aqoonsadaan, kaas oo gelinaya Somaliland go'doon diblomaasiyeed oo gaarsiiya dhaawac aad u wayn oo dhaqan-siyaasadeed (Ecomo-politics).

## DOWLADDA FEDERAL-KA SOOMAALIYA IYO DOWRKEEDA

Intii ay soo ifbaxday aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland, Dowladda Federal-ka Soomaaliya (DFS) waxay qaadday dadaal xooggan oo diblomaasiyeed oo ay kaga hortageyso in aqoonsigaani yeesho saamayn ah in dowlado hor leh aqoonsadaan. Waxaa dadaalladaas garab socday dadaallo kale oo lagu cambaaraynayo faragelinta qaawan ee Israa'iil ee midnimada iyo madaxbanaanida qaranimada Soomaaliya iyadoo garab ka helaysa dowlahada saaxiibka la ah oo ay hoggaaminayaan Turkiga, Sacuudiga iyo Masar.

DFS waxa kale oo ay ku tallaabsatay in ay burisay dhammaan heshiisyadii ganacsi iyo difaac ee ay la lahayd Dowladda Imaaraadka Carabta (UAE) iyadoo ku eedaysay in ay si aan sharci ahayn uga tahriibisay Caydaruus Zubaydi oo ahaa madaxa gooni u goostadka Koonfurta Yemen, isla markaasna gacansaar la leh maamullada DFS ay is hayaan ee Puntland iyo Somaliland.

Sidaas oo ay tahay, waxaan shaki ku jirin in ay jiraan isdiidooyin iyo iska hor imaad mowqifka DFS ee ku aadan Somaliland. DFS waxay si aan horay u qorshaysnayn booqasho iyo aqoonsi isugu dartay maamulkii horay loo oran jiray SSC-Khaatumo iyagoo u aqoonsaday in ay noqoto dowlad xubin ka ah federal-ka Soomaliya (DXF) loona bixiyey Waqooyi Bari.

Arrinkaas caksigeeda, waraysi uu bixiyey Madaxwaynaha DFS, Mudane Xasan Shiikh Maxamuud madasha Al-Jazeera Forum ee ku baxda English bishaan Feb horraankeedi wuxuu caddeeyey in siyaasadda DFS ay tahay in ay Somaliland u aqoonsantahay mid aan la kala goyn karin oo hal mid ah. Taas oo macnaheedu yahay in aysan aqoonsanayn Waqooyi Bari in ay tahay xubin rasmi ah oo ka mid ah DFS.

Iyada oo ay jiraan dhacdooyinkaas oo dhan, hadda waxaa jira khalkhal baahsan oo ah arrimaha gudaha ee Soomaaliya. Waxaa khilaaf xooggan u dhexeeyaa DFS oo dhinac ah iyo Puntland iyo Jubbaland oo dhinac ah. Waxaa iyagana is-afgaran-waa xooggan kala dhexeeyaa DFS isbahaysiga mucaaradka ee la baxay "Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed" oo ay ku midaysanyihiin siyaasiyiin hore iyo madaxda Puntland iyo Jubbaland.

Waxaa jira kala qaybsanaan baahsan oo ka dhexjirta baarlamaanka federal-ka iyada oo ay madaxda DFS oo Madaxwaynaha u horreeyo ay isku deyayaan in la marsiiyo cutubyo hor leh oo ka mid ah bedelaada Dastuurkii ku meelgaarka ahaa iyada oo aan isku aragti laga ahayn ama la isku waafaqsanayn.

Khalkhalkaa gudaha iyo kala daadsanaantu waxay dafiicinaysa mowqifka DFS iyadoo sharciyadeedii ay uga harsanyihiin muddo aad u kooban oo aan ka badnayn 90 maalmood. Heshiis kasta oo ay geli lahayd wuxuu u muuqanayaa in lala gelayo xukuumad taag daran oo aan haysan awooddii saxiixa (Strong mandate).

Iswaydiintu waxay tahay: maxaa la gudboon DFS si ay uga hortagto mowjadaha isdaba jooga ee dibadda oo lagu raadinayo in aqoonsi durugsan loogu helo Somaliland?

Jawaabta tooska ahi waa in DFS marka hore xoojiso midnimadeeda gudaha, raadiso is ogolaansho dhammaan daneeyayaasha siyaasada iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF). Guri hoos ka bolol ah haddii lagu ekaado in korkiisa la dhayo waxaa dumin kara dabaysha u horraysa ee ku dhacda. Dowlad kasta oo daciif ah waxaa hollin karta cid kasta. Dowladaha u qareemaya Somaliland si ay u hesho aqoonsi ka baxsan kan Israa'iil waxay ku doodayaan in DFS ay daciif tahay, ka adkayn sugidda nabadda gudaheeda ama

la dagaallanka argaxisada; halka ay kaga mashquulasantahay sii kala furfurka iyo kala fogaynta intii horay uga tirsanaa.

DFS ma haysato fursado ay ku abuurto khilaaf gudaha ah ama danaha madaxda shakhsiga ah ee kursi doonta ah looga hormariyo danaha guud. Madaxbanaanidii iyo midnimadii guud ee qaranka ayaa halis wayn ku jirta. Waxaa la joogaa xilligii loo midoobi lahaa in la dhisto dowlad ku qotonta mus'aasaad xooggan oo tacliimeed, amni, maxkamadeed iyo ku sharci-dejin haysta kalsoonida shacabka. Markaas kadib ayaa la samayn karaa iska caabbin cadaadis kasta oo dibada ka yimaada.

## GUNAANAD

Aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland waa dhacdadii ugu dhiirranayd ee Geeska Afrika ka dhacda tan iyo dagaalkii qaboobaa. Waa khamaar lagu dooranayo in dib wax looga beddelo xuduudihii sharciga ahaa ee waddamada Geeska Afrika laguna dhaawacayo midnimada dhuleed (Territorial Integrity) iyo madaxbanaanida qaran ee Soomaaliya.

Go'aankani wuxuu muujinayaa in Geeska Afrika uu galay in uu yahay fagaaraha tartanka quwadaha waaweyn. Amniga Bab al-Mandeb wuxuu hadda ku xiranyahay in isbahaysigan cusubi uu noqon doono "Darbiyada Badda Cas" ee ka hortaga liraan, iyo inuu noqon doono dhimbishii shidday dagaal ballaaran oo ka qarxa xeebaha Gacanka Cadmeed.

Waxaa kale oo go'aankani horseedi karaa in DFS iyo DXF ay gartaan in ay tahay waqtigii laga tegi lahaa kala qaybsanaanta iyo burburka gudaha oo loo midoobi lahaa iskuduubnida iyo difaaca danaha qaran iyo dhowridda midnimada dhuleed iyo amniga guud ee qaranka.





**Xigashada Sawirka: Madaxtooyada Somaliland**

# HANNAANKA DOORASHO EE DALKA:

## AKHRIN XAALADEED IYO XULASHOOYIN SIYAASADEED



Zaki Rabiica



Xigashada Sawirka: AI Gen

# HORDHAC

Soomaaliya waxa ay ku jirtaa marxalad soo noqnoqota oo afartii sano mar dalka gelisa hubanti la'aan siyaasadeed iyo walaac qaran. Waa marxalad dadku ay "wadnaha farta ku hayaan", iyaga oo ka warwarsan jihada uu dalku u dhaqaaqayo. Mar kasta oo doorasho soo dhowaato, waxaa sare u kaca xiisado siyaasadeed, muran sharciyeed, iyo cabsi laga qabo in khilaafku isu beddelo dagaal sokeeye iyo kala fogaansho bulshada Soomaaliyeed.

Nasiib darro, weli xal waara looma helin qaab doorasho oo dalka ka saara wareeggan hubanti la'aanta ah. Xukuumadda Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud, inkastoo ay ku timid rajo dib-u-habeyn iyo dhammeystir dastuur, haddana ma aysan suurtagelin in la helo dastuur laysku waafaqsanyahay, dhammaystiran oo qeexaya hannaan doorasho oo lagu wada qanacsanyahay. Dastuurku waa heshiis bulsho oo lagu qoro xeerarka wada noolaanshaha iyo kala dambeynta awoodda; marka uu dhammaystirnaan waayo, khilaaf siyaasadeed ayaa buuxiya booskiisa.

Sanad walba xilligan oo kale, Muqdisho waxa ku soo qulqula waxa loogu yeero "saamilayda siyaasadda", kuwaas oo badankood aan ugu yeero danlayda kursiga Villada yaal. Iyada oo ay dantoodu tahay inta badan sidii ay ku heli lahaayeen nidaam doorasho oo isaga ku haboon una sahla hanashada kursiga, halkii laga eegi lahaa dan qaran oo waarta.

Marka dib loo milicsado xaaladaha la soo maray, waxaa muuqata in doorashada soo socota ay ku koobnaan karto saddex nooc oo waaweyn.

Nooca Koowaad: Doorasho Qof iyo Cod ah (Doorasho Toos ah)

Noocan waxa ay u baahantahay heshiis siyaasadeed oo ballaaran, xukuumad wadaag ah, iyo muddo-kordhin u dhaxaysa hal ilaa laba sano si loo dhiso hay'adaha, loona diyaariyo sharciyad iyo maamul doorasho heshiis lagu yahay, laguna kalsoonaan karo.

# 1. QOF IYO COD XADDIDAN (DEEGAAN KU KOOBAN)

Waa doorasho qof iyo cod ah, balse laga yaabo in lagu koobnaado xarumaha gobollada ama meelaha ay dawladdu si buuxda u maamusho.

**Astaamaha:**

Astaamaha nidaamkan waxaa ka mid ah in kuraasta baarlamaanka lagu saleeyo beelaha sida uu dhigayo hab-qaybsiga 4.5, taas oo ka dhigan in saamiga matalaaddu horey u sii qeexanyahay, balse habka lagu dooranayo wakiillada uu noqonayo mid tartan ah. Musharrixiintu waxay ku tartamayaan kuraasta ay beelahoodu leeyihiin, taas oo ilaalinaysa qaab-dhismeedka awood-qaybsiga ee hadda jira, isla markaana siinaysa bulshada fursad ay si toos ah ugu kala doortaan cidda matalaysa. Sidoo kale, nidaamkan waxaa lagu dari karaa qaab xisbiyeed, si tartanku uga gudbo heer qabiil oo keliya una yeesho aragtiyo siyaasadeed iyo barnaamijyo la isku hayo, inkastoo weli saldhigga kuraastu ku xirnaanayo nidaamka 4.5.

**Faa'iidooyinka:**

Nidaamkan waxa uu siinayaa dadweynaha fursad ay si toos ah ugu doortaan wakiilladooda, taas oo xoojinaysa xiriirka u dhexeeya muwaadinka iyo xildhibaanka isla markaana kordhinaysa isla xisaabtanka siyaasadeed. Sidoo kale, maadaama codka go'aanka leh uu si toos ah uga imaanayo bulshada, waxa uu yarayn karaa ku tiirsanaanta iyo saameynta ay odayaasha dhaqanka iyo maamul-goboleedyadu ku lahaayeen xulista wakiillada, taas oo horey door muhiim ah uga ciyaari jirtay nidaamyada dadban.

**Caqabadaha:**

nidaamkan waxa uu la imanayaa caqabado muuqda, kuwaas oo ay ugu horreeyaan dhaqaale aad u ballaaran oo ku baxaya diiwaangelinta, qalabka farsamada, tababarka shaqaalaha iyo sugidda amniga. Waxa kale oo jirta suurtagalnimada amni xumo, gaar ahaan meelaha ay khataraha amni ka jiraan, taas oo carqaladayn karta habsami u socodka doorashada. Intaa waxaa dheer, muwaadiniin badan oo ku nool deegaanno ka fog xarumaha diiwaangelinta iyo goobaha codbixinta ayaa laga yaabaa in ay ka maqnaadaan ka qaybgalka, taas oo dhaawici karta sinnaanta fursadaha. Sidoo kale, waxaa iman karta cabsi ah in musharrixiinta qaar si toos ah ama si dadban looga hor istaago isa sharaxidda, taas oo wiiqi karta furfurnaanta iyo caddaaladda tartanka siyaasadeed.

## 2. QOF IYO COD QABIILAYSAN

Waa nooc qof iyo cod ah, balse ku dhisan beel ahaan. Cidda wax dooranaysa iyo kan la dooranayaba labaduba waxay ku xiranyihiin beesha kursiga leh.

**Astaamaha:**

Astaamaha nidaamkan waxa ka mid ah in kursi kasta loo aqoonsado deegaan doorasho oo ay leedahay beel gaar ah, taas oo ka dhigan in cidda wax dooranaysa iyo kan la dooranayo labaduba ku xiranyihiin isla beesha kursigaas leh. Qaabkan looma baahna nidaam xisbiyeed, maadaama tartanku si toos ah uga dhex dhacayo xubnaha beesha dhexdeeda, iyadoo muwaadiniintu dooranayaan musharraxa ay u arkaan inuu matalaad wanaagsan siin karo. Sidoo kale, doorashadu waxay ka dhacaysaa dalka oo dhan hal mar, taas oo siinaysa nidaamka isku mar qabsoomid qaran, isla markaana yarayn karta kala jiidashada wakhtiga iyo faragelinta maamullada iyo dawladda federaalkaba.

**Faa'iidooyinka:**

Nidaamkan waxa adkaanaysa in la musuqmaasuqo, maadaama tirada codbixiyeyaashu ay aad u badantahay, taas oo yaraynaysa suurtagalnimada in koox yar lagu maamulo ama lagu iibsado natiijada. Markasta oo tiradu ballaarato, kharashka iyo dadaalka lagu sameyn karo faragelinta sharci-darrada ah wuu kordhaa, taas oo si dabiici ah u xaddidaysa musuqmaasuqa. Sidoo kale, diiwaangelintu waxay noqoneysaa mid hal mar qaran ahaan loo wada qabto, taas oo fududayn karta maamulka iyo habsami u socodka doorashada, isla markaana abuuri karta kayd xogeed mideysan oo mustaqbalka laga faa'iideysan karo.

**Caqabadaha:**

Nidaamkan weli wuxuu u baahanyahay muddo-kordhin si loo diyaariyo sharciyadiisa, loona dhiso hay'adaha iyo farsamooyinka fulinaya doorashada. Waxa kale oo uu u baahanyahay dhaqaale iyo qorshe amni oo xooggan, maadaama diiwaangelinta iyo sugidda goobaha codbixintu ay ku fidi doonaan dalka oo dhan. Intaa waxaa dheer, maadaama qaabkani si toos ah ugu dhisanyahay beel, waxaa jirta khatar ah in siyaasadda lagu sii xoojiyo qabiilka, halkii laga gudbi lahaa loona wareegi lahayd aragtiyo iyo barnaamijyo qaran oo ka tarjumaya dan guud.

## NOOCA LABAAD: DOORASHO DADBAN (INDIRECT ELECTION)

Noocan uma baahna isbeddel xukuumadeed, balse wuxuu u baahanyahay muddo-kordhin farsamo oo lagu qabto doorashada. Waa qaab la mid ah kii 2016 ama 2022, iyadoo isla xukuumaddii jirta ay qaban karto.

## 1. KU NOQOSHADA NOOCII 2016/2022 AMA MID U EG

Astaamaha:

Nidaamkan waxa uu ku dhisanyahay ergooyin ay soo xulaan odayaasha dhaqanka, kuwaas oo noqda cidda si toos ah u dooranaysa xildhibaannada. Habka xulista ergada iyo habsami u socodka doorashadaba waxa saamayn muuqata ku leh maamul-goboleedyada, kuwaas oo door ka ciyaara hagidda iyo jihaynta geeddi-socodka. Inkastoo maamulka doorashada lagu tilmaamo mid wadaag ah oo u dhexeeya heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, haddana awoodda dhabta ah ee saameynta leh inta badan waxay gacanta ugu jirtaa maamul-goboleedka martigelinaya doorashada.

**Faa'iidooyinka:**

Qaabkan waa nidaam hore loo soo tijaabiyay oo dalka ka dhacay, sidaa awgeed dhinacyada siyaasadda iyo hay'adaha fulinta waxay leeyihiin waayo-aragnimo ku saabsan habraaciisa iyo sida loo maareeyo. Tani waxay ka dhigaysaa mid aan u baahnayn diyaarin farsamo oo ballaaran ama qalab iyo hannaan cusub oo la dhiso, maadaama qaab-dhismeedkiisii hore iyo khibraddii laga helay ay fududayn karaan hirgelintiisa mar kale.

**Caqabadaha:**

Nidaamkan waxa hareeya eedo la xiriira musuqmaasuq iyo faragelin siyaasadeed, maadaama tirada ergadu ay koobantahay isla markaana ay fududaan karto in la saameeyo ama lagu hago jihada ay rabaan daneeyayaasha awoodda leh. Sidoo kale, inkastoo uu yahay doorasho dadban, haddana wuxuu u baahanyahay dhaqaale iyo qorshe amni oo qaali ah si loo sugo goobaha doorashada iyo badqabka ergada. Intaa waxaa dheer, qaabkan waxaa si gaar ah u riixaya qaar ka mid ah maamul-goboleedyada, gaar ahaan Puntland iyo Jubaland, kuwaas oo u arka in uu siinayo door iyo saameyn ballaaran oo ay ku yeeshaan habsami u socodka iyo natiijada doorashada.

## 2. DOORASHO DADBAN OO CASRIYEEYSAN

**Astaamaha:**

Nidaamkan waxa lagu gartaa in goobaha doorashada la ballaariyo si ay uga dhacaan xarumo badan oo ay dawladdu gacanta ku hayso, taas oo yarayn karta ciriiriga iyo isku ururinta hal meel. Sidoo kale, kuraasta looma dooranayo mid mid oo gooni ah, balse waxaa loo qaabeeyaa koox-koox, iyadoo koox kasta ay wada dooranayaan ergooyin isku mar u codeynaya kuraastaas. Dhanka kale, ergada dooranaysa musharrixiinta waxaa soo xulaya 135-kii oday dhaqameed, taas oo ka dhigan in asalka matalaadda uu weli ka soo bilaabanayo odayaasha, inkastoo habka codbixintu noqdo mid nidaamsan oo ballaaran.

**Faa'iidooyinka:**

Qaabkan waxa uu yareyn karaa boobka iyo faragelinta maamul-goboleedyada, maadaama habraaca loo qaabeeyo si nidaamsan oo aan si fudud loogu kala maamuli karin hal meel ama hal koox. Marka kuraasta loo doorto si koox-koox ah oo goobaha la ballaariyo, waxaa adkaanaysa in si gaar ah loo maamulo natiijada kursi kasta. Sidoo kale, maadaama doorashadu isku mar uga dhaceyso dhowr goobood, waxay abuureysaa hannaan isku xiran oo dedejinaya geeddi-socodka isla markaana yarayn kara suurtagalnimada in marxalad-marxalad loo farageliyo.

**Caqabadaha:**

Nidaamkan weli kama marna saameynta maamul-goboleedyada, kuwaas oo awood u yeelan kara inay si toos ah ama dadban u farageliyaan habsami u socodka doorashada. Intaa waxaa dheer, inkastoo uu yahay qaab la nidaamiyey, haddana wuxuu u baahanyahay dhaqaale iyo qorshe amni oo xooggan, maadaama doorashadu ka dhaceyso goobo badan isla markaana ay ku lug leeyihiin ergooyin tiro badan. Haddii maamulka guud ee doorashada si buuxda loogu daayo maamul-goboleed gaar ah, khatar ayaa jirta in geeddi-socodku u janjeero dan gaar ah, taas oo dhaawici karta kalsoonida iyo wada-oggolaanshaha qaran.

## NOOCA SADDEXAAD: DOORASHO ODAYAAL TOOS U MAGACAABAAN (QAABKII 2012)

Waa nooca keliya ee aan u baahnayn muddo-kordhin ama kharash badan.

**Astaamaha:**

Nidaamkan waxa uu ku salaysanyahay in 135-kii oday dhaqameed ay si toos ah u magacaabaan xildhibaannada, iyaga oo aan loo marin hannaan codbixin dadweyne ama ergo ballaaran. Sidaas darteed, looma baahna diiwaangelin muwaadiniin ama abaabul farsamo oo heer qaran ah, maadaama go'aanku ku koobnaanayo odayaasha la aqoonsan yahay, taas oo ka dhigaysa hab fudud oo degdeg ah marka loo eego noocyada kale ee doorashooyinka.

**Faa'iidooyinka:**

Nidaamkan waxa uu u baahanyahay dhaqaale aad u yar marka loo eego noocyada kale ee doorashooyinka, maadaama uusan ku lug lahayn diiwaangelin ballaaran, qalab farsamo ama sugid amni oo heer qaran ah. Sidoo kale, wuxuu ku qabsoomi karaa waqti gaaban, maadaama go'aanku ku koobnaanayo tiro xaddidan oo odayaal ah. Marka la barbar dhigo qaababka kale, waxa uu keeni karaa khilaaf siyaasadeed oo ka yar kuwa kale, maadaama tartanku uusan ku fidayn dadweyne ballaaran ama heerar maamul oo kala duwan, inkastoo doodaha ku saabsan matalaadda iyo sharciyaddiisu ay weli jiri karaan.

**Caqabadaha:**

Si kastaba ha ahaatee, nidaamkan waxa horyaalla caqabado u baahan in si cad loogu heshiiyo, gaar ahaan marka ay timaaddo odayaashii dhintay ama hawlgab noqday iyo habka lagu buuxinayo booskooda si sharciyad iyo aqoonsi buuxa loo helo. Waxaa kale oo suurtagal ah in muranno ka dhashaan saxiixyada, matalaadda iyo cidda xaqa u leh magacaabista, taas oo keeni karta khilaaf beeleed ama siyaasadeed. Sidaas awgeed, waxaa lama huraan ah in la helo guddi lagu wada heshiiyey oo u qaabilsan xalinta khilaafaadka, si loo hubiyo in geeddi-socodku ahaado mid la aqbali karo oo aan dib u hurin muran siyaasadeed.

## UGU DAMBAYNTII

Doorashada dalka ma aha oo keliya hannaan farsamo; waa imtixaan qaran oo hal-beeg u ah bisaylka siyaasadeed iyo awoodda lagu maareeyo khilaafka. Saddexdan nooc mid walba wuxuu leeyahay suurtagalnimo iyo caqabado u gaar ah. Doorashada dhabta ah ee hortaalla Soomaalida ma aha oo keliya nooca la qaadanayo, balse waa su'aasha ah: ma awoodnaa in aan heshiis qaran ka gaarno mustaqbal wadajir ah?

Marka si dhab ah loo eego, dhammaan noocyada doorasho ee kor lagu soo bandhigay muran ayaa ku hareeraysan. Mid walba wuxuu leeyahay dhinacyo lagu kala aragti duwan yahay—ha ahaato sharciyaddiisa, saamaynta maamul-goboleedyada, kharashka, amniga ama suurtagalnimadiisa siyaasadeed. Sidaas darteed, doorashadu maanta ma aha oo keliya su'aal farsamo, balse waa su'aal ku saabsan is-aaminaad iyo heshiis siyaasadeed oo qaran.

Haddii Golaha Mustaqbalka iyo mucaaradkuba si cad u diidaan muddo-kordhin nooc kasta ha ahaatee, markaas si macquul ah waxay ku khasbanyihiin in ay qaataan qaabkii 2012 lagu galay doorashada—oo ah in 135 oday si toos ah u magacaabaan xildhibaannada. Waa qaabka keliya ee aan u baahnayn waqti dheeraad ah, diyaarin farsamo ama isbeddel xukuumadeed. Inkastoo uu leeyahay dood iyo dhaliil u gaar ah, haddana waa qaab degdeg lagu gaari karo si looga baxo qalalaasaha waqtiga.

Haddiise ay jirto diyaar u ahaansho muddo-kordhin kooban oo farsamo—qiyaastii saddex ilaa lix bilood—markaas dalka waa inuu aadaa doorasho dadban oo casriyeeysan, taas oo si cad loo dhimayo saamaynta maamul-goboleedyada iyo xukuumadda federaalka intii macquul ah. Qaabkani wuxuu noqon karaa xal ku meel gaar ah oo hagaajiya habraacyadii hore, isla markaana yareeya faragelinta iyo eedaha musuqmaasuqa.

Balse haddii la rabo in muranka doorasho si waara loo soo afjaro, dalkuna u gudbo nidaam qof iyo cod ah, markaas lama huraan ayey noqoneysaa muddo-kordhin dheer iyo in la dhiso dawlad wadaag ah oo lagu heshiiyo. Tani waa dariiqa keliya ee suurtagelin kara in si dhab ah looga heshiiyo dastuur dhammaystiran, sharciyada doorashada, iyo hay'adaha maamulaya. Waxaa laga yaabaa in nidaamka qof iyo codku marka hore noqdo mid ku salaysan xaalad gaar ah oo ka duwan qaababka caalamka, balse waa nidaam la horumarin karo sanadaha xiga. Taasi waxay noqon lahayd bootin weyn oo dhanka horumarka ah—midkii ugu horreeyey ee noociisa ah tan iyo dowladdii rayidka ahayd ee lixdamaadkii—oo dalka ka saari kara wareegga hubanti la'aanta ee afartii sano mar soo noqnoqda.

**W/Q:** Zaki Rabiica




**Xigashada Sawirka: AI**

# JIGJIGA, DAAHFURKA XARUNTA DALXIISKA IYO DAREENKA QARSOON



Maxamed Xasan Cirro



Xigashada Sawirka: Villa Somalia

Janaayo 31, 2026, waxaa Dowlad Deegaanka Soomaalida laga daahfuray xarunta dalxiiska Shabeelley, xafladdii furitaanka waxaa lagu casuumay madax Soomaaliyeed oo kala duwan oo dalalaka gobolka ka socotay.

Xafladda furitaanka goobtaani waxa ay ahayd war weyn oo maalmo haystay warbaahinta dalka Itoobiya iyo Soomaalida, goobta oo ah meel aad loo qurxiyey, leh goobo nasasho, meelo wax laga cunno, goobo carruurtu ku ciyaarto, goobo la daawado oo leh dariiqyo tamashlayn, haddana quruxda iyo dalxiiska la arkayey waxa ku hoos duugnaa fariimo siyaasadeed oo uu xambaarsanaa kulamada daahfurka, waana sababta ay dhacdadu u ahayd mid warbaahin badan tebiso, waxa ayna ahayd waxa keenay in indho siyaasadeed lagu eego xafladda oo dhalisay kala aragti duwanaansho ay dadka Soomaaliyeed ka fureen doodo.

Waxa ammaanta koowaad leh waa in dowlad deegaanka Soomaalidu helay fursado maal gelin iyo furfurnaan siyaasadeed oo uu kaga baxayo go'doon uu ku jiray dhulkaasi tobanaan sano, in laga furo xarun dalxiis waxay u tahay baaq ku saabsan in uu jiro isbeddel maamul oo aan ku dhisnayn duudsi iyo caburin, haddii dalxiis la diyaariyo waxa ku hoos jira waa in ay fududaato isu socodka, maal-gashiga, shaqo abuurka iyo in la qaado dhammaan wixii xannibaad ah, suurtogalna ay noqoto in Jigjiga ay yimaaddaan duullimaadyada tooska ah ee dunida ku xiraya, taasoo noqon karta isbeddel weyn oo siyaasadeed oo ku yimid siyaasadda Itoobiyadii la yiqiinay.

Dhinac kalese kulan madaxeed ka dhacay goobta xarig jarka waxa ay ahayd ismuujin awoodeed iyo farriimo siyaasadeed oo dalalka midba kan kale tusinayey.

Raysalwasaaraha Itoobiya Abiy Ahmed oo ahaa masuulka loo marti ahaa, wuxuu casuumay madaxweynayaasha Soomaaliya, Jabuuti, iyo masuuliyin sarsare oo Soomaali ah oo ka yimid dalka Kenya.

Farriinta Ra'iisalwasaare Abiy uu dirayey waa caddayd, waa in Itoobiya tahay weli awood ka jirta gobolka, oo aysan dagaallada iyo qaybsanaanta dalkiisa ka jirtaa wax u dhimin saamaynteedii arrimaha Soomaalida, tahayna tan wax laga weydiinayo, wuxuu muujiyey in uu awood u leeyahay in uu kala dooran karo madaxda Soomaalida kuwa uu u yeeri karo, uuna hadda doortay in uu u yeerto madaxweynaha dalka Soomaaliya Xasan Shiikh Maxamuud, farriinta arrintan bixinaysay waa in cid kasta oo danaynaysa siyaasadda gudaha ee Soomaaliya aysan marna saamaynta Itoobiya iska indho tiri karin.

Farriinta kale ee uu Abiy diray waxa ay ku socotay Soomaalida, waxayna ahayd in Jigjiga ay hadda tahay magaalo muhiim u ah Itoobiya, waxkasta oo taariikh hore ah oo gabowday oo sheegasho Soomaaliyeed ahina aysan macno lahayn, Ra'iisalwasaare Abiy wuxu si xirfadaysan ugu guulaystay muujinta labadaas fariimood.

Waxa cadaynaya fariimaha Abiy waa sababta uu Ra'iisalwasaaruhu u casuumi waayey cid kale oo aan Soomaali ahayn, xitaa dalka Kenya oo ay Itoobiya ka dhaxayso heshiis amni wefdiga ka yimid waxa ay ahaayeen Soomaali, taasoo muujinaysa fariin ka weyn kulan lagu daahfurayo goob dalxiis, waxaana cad danta uu Abiy ka lahaa qorshahan inu uu yahay ka guul gaarista aasida taariikhda ay magaalada Jigjiga u leedahay Soomaalida iyo is muujintiisa uu ku hananayo saamayntii ay mar Itoobiya ku dhex lahayd siyaasadda Soomaalida, waana dareenka taban ee laga qaatay booqashada madaxda Soomaalidu ku tagtay magaalada Jigjiga.

Madaxweyne Xasan Shiikh oo ka mid ah madaxdii daahfurka lagu marti qaaday tegistiisa magaalada Jigjiga waxay ku ahayd laba daran mid dooro, tan hore waa in uusan diidi karin marti qaadka uga yimid Abiy, oo wuxuu hubaa in diidmadiisu sababi doonto in madaxweynayaal maamul goboleed oo ay siyaasadda dalka isku diidanyihiin ay si fudud u bedeli karaan, oo soo camiri karaan xafladda, halkaasna ka soo dhagax tuurayaan, tanina waa tan u nuglaysay in uu Madaxweyne Xasan Shiikh u hibeeyo awood iyo ismuujin horay aan uga muuqan Ra'iisalwasaare Abiy oo uu ku helay isku garaaca siyaasiyiinta kala tagsan ee Soomaalida.

Arrinta kale ee saamaynta taban ku leh madaxweyne Xasan Shiikh waa in uu yahay madaxweyne Soomaaliyeed oo tegey magaalada Jigjiga oo uu qiray in ay tahay dhul Itoobiya, tani waxay ay tumaati ku tahay dareenka soo jireenka ah ee Soomaalida oo marna aan aqbalin in dhulka Sooomaalida ay leedahay Xabashi, dareenkaas oo ku dhex huursan Soomaalida oo markii ay awood helaanna si fudud u holci kara.

Madaxda kale ee tagtay kulanka daahfurka xarunta dalxiiska ee Jigjiga waxa ka mid ahaa madaxweynaha Jabuuti Ismaaciil Cumar Geelle, hadda dalkiisa wuxuu dareemayaa culaysyo ka haysta colaaddo ka furan xuduudaha, dhinaca Eritrea hishiis lama ahan oo ciidamada labada wadan waxa ay isugu jiraan dhufays. Xuduudka goboladda waqooyi galbeed ee Soomaaliya maamulka ka jira ee Somaliland xiriirkoodu waa soo xumaanayey sanadihii la soo dhaafay. Dhinaca dalka Yemen awoodo is diiddan ayaa isku hirdiyaya oo mid kastaa ku yahay culays amniga dalka Jabuuti.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle waxa ay Itoobiya u tahay dariiqa ganacsi iyo ammni ee waqtigan u furan Jabuuti, waana taas tan keentay in ay muhiim u tahay in uusan ka baaqan karin xafladda Jigjiga, wax kasta oo taariikh ay lahayd magaalada Jigjigana aysan ugu ahayn muhiim.

Muhiimadda taariikheed ee magaalada Jigjiga, waxay ku caddahay sida ay laf dhabar ugu ahayd halgamadii xornima-doonka Soomaalida. Sanadkii 1901dii, wuxuu dagaal dhiig badan ku daatay ku dhex maray ciidamadii boqorkii Xabashida ee Minilik iyo dhadhaqaaqii gobanima doonka ee Daraawiishta ee uu hogaaminayey Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, waxaana dagaalkaas lagu jabiyey ciidamadii Xabashida, wuxuuna dagaalkaasi hakiyey duullaamadii dhul balaarsiga ahaa ee uu waday boqorkii Xabashidu.

Markii la soo gaaray 1943-dii, ee la dhisay ururkii dhallinyarada gobanimadoonka Soomaliyeed ee SYL, xafiiskiisii ugu horeeyey ee ururkaasi yeesho waxaa laga furay magaalada Jigjiga. Furitaanka xafiiska ee Jigjigga wuxuu lahaa muhiimad gaar ah oo dhinaca istiraatijiyadda iyo juquraafiga ah. Tan hore waa in ay ahayd magaalada ugu weyn jihada waqooyi dhexe ee galbeed ugu xigta dhulka Soomaalida, iyo in ay muhiim u ahayd aragtida dhismaha Soomaaliweyn oo ka mid ahayd tiirarkii iyo mabaadi'idii ay ku taagnaayeen ururkii SYL.

Markii Dhulka Soomaalida lagu wareejiyey Xabashida 1954-tii, dowladda Itoobiya waxa ay Jigjiga ka dhisatay saldhigyo ciidan iyo talisyo adag oo ciidamada Itoobiya weerarro ka qaadi karaan, waana goobta ay Itoobiya ka soo abaabushay duullaankii 1964 ee ay ku soo qaadday jamhuuriyadda Soomaaliya, iyadoo isku dayday in ay ka soo talowdo xuduudaha Tog-Wajeele iyo Garayo Cawl oo hadda ka kala tirsan gobollada Waqooyi Galbeed iyo Awdal, dagaalkaas waxaa lagu jebiyey ciidamadii Itoobiya.

Magaalada Jigjiga waxaa kale oo ay ka mid ahayd goobihii dagaalladii ugu xumaa ka dhaceen dagaalkii weynaa ee Ogadeen ee dhexmaray Soomaalida iyo Xabashida sanadihii 1977 ilaa 1978, waxa ayna Jigjiga ku lahayd dagaalka taariikh gaar ah.

Jigjiga hadda waa caasimadda dowlad deegaanka Soomaalida ee dhulka ku jira Itoobiya, waa magaalo ka sarraysa joogga badda qiyaasta wax ka badan 1600 oo mitir, cimilo ahaan waa magaalo leh cimilo deggan oo dhexdhexaad ah, inkasta oo bilaha Nofeembar ilaa Febaraayo ay leedahay cimilo la oran karo waa yara qabow, waxa ay dhacdaa dhul ku haboon beerashada iyo dhaqashada xoolaha, waxa ayna leedahay muhiimad ganacsi oo ay isku xirto qaybaha gobollada waqooyi ee Soomaaliya iyo caloosha Itoobiya.

Xasillooni siyaasadeed oo dowlad deegaanku helay sanadihii tegey ayaa u keentay in Jigjiga hesho maal-gashi iyo in magaaladu kobocdo oo bulsho badan oo Soomaali ahi degaan, iyagoo soo raacaya xasilloonida iyo maamulka dowliga ah ee ka jira oo keenaya fursado nololeed.

**W/Q:** Maxamed Xasan Cirro

Falanqeeye iyo taariikh yahan.



**Xigashada Sawirka: Villa Somalia**

# KOBCINTA KAABAYAASHA DHAQAALAHA IYO DHISIDDA AADANAHA: KEE MUDNAANTA LEH?



Bashiir Suulay




Xigashada Sawirka: AI

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay dalalka ugu saboolsan adduunka marka dhinac kasta laga eego. Warbixinno iyo cilmi-baarisyo ay si madax-bannaan u daabaceen World Bank (2024), UNDP (2024) iyo Somalia National Bureau of Statistics (2023) ayaa isku raacay in in ka badan 50% bulshada Soomaaliyeed ay ku nool yihiin saboolnimo.

Dhanka waxbarashada, xog ay daabacday Geneva Global Hub for Education oo cinwaankeedu yahay "Somalia's Education Crisis" ayaa si cad u muujinaysa baaxadda dhibaatada jirta. Warbixintu waxay tilmaamaysaa in 3.4 milyan oo carruur Soomaaliyeed ah oo gaaray da'da waxbarashada aysan waxbarasho helin, halka 58% carruurtu ay banaanka ka joogaan nidaamka waxbarashada, taasoo keentay in celceliska sannadaha waxbarasho ee carruurta Soomaaliyeed uu noqdo 1.7 sano oo keliya, taas oo 78% ka hooseysa celceliska Afrika oo ah 7.7 sano cunuggiiba.

Kaabayaasha dhaqaalaha ee dalka ayaa iyaguna aad u liita, nooc kasta oo ay yihiinba. Isku geynta caqabadahaas, oo ay sii dheer yihiin dhibaatooyinka amni iyo xasillooni-darro ee jira, ayaa Soomaaliya ka dhigaya mid ka mid ah dalalka ugu nugul uguna liita adduunka.

## DALKA MISE DADKA?

Dalka noocaas ah si loo kobciyo loogana saaro xaaladda uu ku suganyahay, waxa lama huraan ah in la helo qorshe qaran oo si cad u qeexaya himilada la hiigsanayo iyo waddada lagu gaari karo. Si kastaba ha ahaatee, gudaha Soomaaliya waxa caado noqotay in la arko siyaasiyiin iyo hoggaamiyeyaal ku faanaya dhismaha laamiyo yaryar oo qaarkood aan xitaa gaarin hal kiiloomitir, kuwaas oo loo soo bandhigo guulo waaweyn oo wax weyn ku soo kordhinaya dalka.

Haddaba, maqaalkan waxa aynu ku eegi doonnaa haddii Eebbe idmo dadka iyo dalka kan ay tahay in la hormariyo dhisiddiisa si loo helo horumar waara oo macno leh.

Tusaalaha ugu habboon ee arrintan lagu caddeyn karo waxa uu yahay hannaankii uu ku dhaqmay Nabi Muxamed (NNKH). Markii uu soo baxay, asxaabtiisu waxa ay ku noolaayeen duruufo adag oo dhaqaale iyo bulsho. Si kastaba ha ahaatee, waxa uu awooday in uu ku hago jid ka sarreeya danaha gaarka ah sida dhismaha guryo qurxoon ama kaabayaal dhaqaale oo keliya noloshooda hagaajiya.Taa beddelkeeda, waxa uu doortay in uu mudnaanta koowaad siiyo dhisidda qofka iyo bulshada, si ay u noqdaan kuwo leh akhlaaq, aqoon iyo aragti guud oo ka shaqeysa danta guud.

Asxaabtiisu waxay ku tababaranayeen fahamka qiimaha caddaaladda, dulqaadka, samafalka iyo wadajirka bulshada. Si tartiib tartiib ah ayey u noqdeen kuwo leh aqoon, hanuun iyo akhlaaq wanaagsan, taas oo u sahashay in mustaqbalka ay door weyn ka qaataan dhisidda bulsho mideysan oo horumarsan. Nabi Muxamed (NNKH) wuxuu noqday tusaale cad oo muujinaya in maalgelinta dadka, horumarinta nafta, iimaanka iyo aqoontu ay ka muhiimsan yihiin dhismayaasha waddooyinka iyo kaabayaasha dhaqaale ee keliya. Dhisidda qofka ayaa noqota saldhigga dhismaha bulsho iyo dowlad waarta.

Qoraaga caanka ah ee reer Brazil, Paulo Coelho, ayaa la sheegay in maalin isaga oo wax akhrinaya uu la kulmay wiil yar oo su'aalo badan weyddiinayay. Markii su'aalihii badnaadeen, wuxuu go'aansaday inuu wiilka yar si kale ugu mashquuliyo si uusan mar dambe u rabshin inta uu akhriska ku jiro. Paulo waxa uu agtiisa ka qaatay warqad yar oo uu ku sawirnaa khariidadda dunida. Markaas ayuu jeex-jeexay, dabadeedna u dhiibay wiilkii yaraa isaga oo ku yiri, "Haddii aad khariidadda sidiisii ugu soo celiso, waan wada hadli doonnaa, wax kasta oo aad rabtana waan kaaga jawaabi doonaa." Qoraagu waxa uu markaas is lahaa wiilka yar arrintaasi ma xallin doono, waayo waa hawl adag in qof si fudud isugu soo celiyo khariidad la jeexjeexay, qof yarna warkiisaba daa. Hase yeeshee, dhowr iyo toban daqiiqo ka dib ayuu wiilkii yaraa soo noqday isaga oo sita khariidaddii oo sidiisii ah. Arrintaasi aad bay uga yaabisay qoraagii, wuxuuna si degdeg ah u weydiiyay wiilka sida ay ugu suurtogashay inuu hawshaas si fudud u qabto. Wiilkii yaraa wuxuu ku jawaabay: "Warqaddii aad i siisay gadaasheeda waxa ku sawirnaa qof bini-aadam ah. Markii aan isku aaddiyay xubnaha qofkaas gadaal ku sawirnaa, markii aan dhammeeyay ayaan arkay in khariidaddii duniduna si toos ah isugu aaday."

Sheekada Paulo Coelho ee wiilka yar iyo khariidadda dunida waxay xambaarsantahay xikmad falsafadeed oo qoto dheer oo ku saabsan dhisidda qofka iyo doorka uu ku leeyahay horumar waara. Markii wiilkii yaraa uu sheegay in uu si fudud u hagaajiyay khariidadda sababtoo ah waxa uu marka hore isku aadsiiyay sawirka qofka bini-aadamka ah ee gadaal ku sawirnaa, Coelho

waxa uu fahmay in isbeddelka weyn ee dunidu uu ka bilaabmo qofka laftiisa.

Fikraddani waxay si cad ula jaanqaadaysaa aragtida human capital theory, oo tilmaamaysa in maalgelinta aqoonta, xirfadaha iyo akhlaaqda dadka ay tahay saldhigga horumar waara, ka hor inta aan la maalgelin kaabayaal ama dhismayaal kale. Marka qofka la dhiso, bulshada iyo qarankuba si dabiici ah ayay u hagaagaan.

Sidaas darteed, sheekadani waxay bixisaa tusaale wax ku ool ah oo muujinaya in guul kasta oo bulsho ama qaran lagu gaaraa ay ku xirnaan karto horumarinta dadka. Fahamka, hanuunka iyo dhisidda qofka ayaa horseedi kara saameyn ballaaran oo ku fida bulshada iyo dhaqaalaha. Paulo Coelho waxa uu sheekadan ka dhigay cashar nolosha ku saabsan, kaas oo muujinaya in maalgelinta dadka iyo hagidda toosan ee qof walba ay tahay waddada ugu macquulsan ee lagu gaari karo horumar waara.

## GUNAANAD

Ugu dambayn, sida ay muujinayaan tusaalayaasha kor ku xusan, horumarka waara waxa uu ka bilaabmaa dhisidda dadka, aqoontooda, akhlaaqdooda, xirfadahooda iyo fahamkooda mas'uuliyadda guud. Taariikhda Islaamka, falsafadda horumarka casriga ah iyo aragtiyada cilmiga dhaqaalaha dhammaantood waxay isku raacsan yihiin in maalgelinta awoodda iyo kartida dadka ay tahay tiirka ugu muhiimsan ee lagu gaari karo koboc bulsho iyo mid dhaqaale.

**W/Q:** Bashiir Suulat



# **PUNTLAND:** QORSHAHA HORUMARINTA AFRAAD EE 2026–2029 MUXUU KU SALAYSAN YAHAY —KAALMO DIBADEED MISE ISKU-TASHI BULSHO?



Axmex Siciid
Aw-nuur




Xigashada Sawirka: Puntland State House

## HORDHAC

Qormadan waxaan akhristayaasha ugu iftiimin doonaa: waa maxay horumarin? Maxay yihiin aragtiyaha horumarinta ee caalamku soo maray ama tijaabiyey? Ma jiraa nidaam horumarineed oo la isku raacsan yahay oo dal kasta raaci karo? Ma jiraa dal dunida ka mid ah oo horumar ku gaaray kaalmo dibadeed oo keliya? Maxaase saldhig u ah in dal uu horumar ku tallaabsado? Ugu dambayn, sidee bulshada Soomaaliyeed iyo hoggaamiyayaashoodu u fahamsan yihiin dariiqa lagu gaari karo horumar waara?

## WAA MAXAY HORUMAR (WHAT IS DEVELOPMENT)?

Inta badan aqoonyahannada arrintan wax ka qoray, oo uu ka mid yahay Francis Fukuyama, waxay horumarka ku qeexaan inuu yahay isbeddel togan (positive change) oo ka dhaca dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, arrimaha bulshada iyo ku dhaqanka sharciga. Si kastaba ha ahaatee, ma jiro hannaan horumarineed oo la isku waafaqsan yahay oo xal u noqon kara dhammaan bulshooyinka ama dalalka doonaya inay horumar ka sameeyaan dhinacyadaas (there is no one-size-fits-all). Haddaba, dal kasta ama bulsho kasta, iyadoo tixgelinaysa duruufteeda, taariikhdeeda iyo xaaladaha u gaarka ah, waxay dejisaa nidaam horumarineed oo ku habboon xaqiiqadeeda iyo baahideeda gaarka ah.

Tan iyo markii mawduuca horumarintu si cilmiyeysan u soo shaac baxay, gaar ahaan wixii ka dambeeyay Dagaalkii Labaad ee Adduunka, waxaa jiray dooddo waaweyn oo ku saabsan sida horumarka dal ku iman karo. Qolo walba waxay arrinta ka eegtaa aragti u gaar ah. Qaar ka mid ah aqoonyahannadu waxay ku doodayaan in kaalinta firfircoon ee dawladdu ay tahay tiirka kobciya isla markaana horseeda horumarka dal iyo bulsho. Halka kuwo kalena ay aaminsan yihiin in dhibaatadu ka timaaddo dawlad aad u faro badan; sidaas darteedna ay habboon tahay in la yareeyo kaalinteeda, lana xoojiyo suuqa xorta ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, xaqiiqadu waxay muujinaysaa in iskaashi dheellitiran oo u dhexeeya dawlad leh maamul wanaag iyo suuq xor ah oo nidaamsan uu dalal badan oo caalamka ka tirsan u horseeday inay gaaraan horumar muuqda oo waara.

Qaar ka mid ah aragtiyahannada horumarintu waxay ku doodayaan in waddamadu si ay horumar u gaaraan ay lagama maarmaan tahay inay si dhow ula shaqeeyaan dunida inteeda kale, kana faa'iidaystaan isdhexgalka caalamiga ah (globalization) ee dhinacyada ganacsiga, tiknoolajiyadda iyo maalgashiga. Dhanka kale, waxaa jira kuwo aaminsan in waddanku uu yareeyo ku tiirsanaanta iyo saameynta ka imanaysa dibadda, gaar ahaan tan hay'adaha caalamiga ah, isla markaana xoogga saaro isku-tashi, horumarinta khayraadkiisa gudaha iyo dejinta siyaasad u gaar ah oo waafaqsan danihiisa qaran. Aragtidan dambe waxaa tusaale muuqda u ah dalka Malaysia, gaar ahaan siyaasaddii iyo hoggaamintii ra'iisul wasaarihii hore Mahathir Mohamad, oo diiradda saaray isku-filnaansho qaran, horumarinta warshadaha gudaha iyo ka faa'iidaysiga khayraadka dalka si madax-bannaan.

Qaar baa ku dooda in xoogga la saaro kobcinta dhaqaalaha, wax-soo-saarkana la badiyo (gross domestic product), iyadoo aan muhiimad gaar ah la siinayn sida dhaqaalahaas bulshada dhexdeeda loogu qaybinayo (resource distribution). Tusaale ahaan, arrimaha bulshada sida waxbarashada, caafimaadka iyo adeegyada bulsho ee kale ee loo baahan yahay. Qaar kale ayaa ku dooda in kobcin dhaqaale oo aan dadku u sinnayn, khayraadkana aan bulshada looga faa'iidayn ee ay dad yari ka faa'iidaan, aan horumar lagu tilmaami karin.

## ARAGTIYAHA HORUMARINTA CAALAMIGA AH (INTERNATIONAL DEVELOPMENT THEORY)

Badanaa reer galbeedka waxaa lagu dhaliilaa in mucaawinada dibadda ay bixiyaan (foreign aid) ay salka ku hayso dano gaar ah oo ay dawladahaasi leeyihiin, kuwaas oo la xiriira waxa loogu yeero casriyeyn (modernization). Tani waxaa lagu macneeyaa fikrad ka turjumaysa in dib u dhaca bulshooyinka lagu sababeeyo dhaqanka iyo caqiidooyinka ay aaminsan yihiin (cultural beliefs), sidaas darteedna loo arko in caadooyinkaas dib u dhaca keenaya la beddelo, la casriyeeyo lana baddelo dhaqankooda si ay u noqdaan bulsho casri ah oo la mid ah bulshooyinka reer galbeedka.

Aad bay u tiro badan yihiin aragtiyaha horumarinta ku salaysan ee la soo tijaabiyey tan iyo dagaalkii labaad ee adduunka ka dib. Qormadan kuma soo wada koobi karno dhammaantood; hase yeeshee, fikradaha horumarinta ugu waaweyn (development theory) waxaa ka mid ah aragtida casriyeynta ee aan kor ku soo sheegnay, oo soo bilaabatay dagaalkii labaad ka dib, aadna u shaqaysay xilligii Dagaalkii Qaboobaa ilaa dabayaaqadii toddobaatanaadkii. Muddadaas ay jirtay fikradda casriyeyntu, waxaa abuurantay fikrad ka horjeedda oo loo bixiyey aragtida horumarinta ee

ku tiirsanaanta (dependency theory). Aragtidan waxaa soo bandhigay aqoonyahanno ka soo jeeda dunida saddexaad, kuwaas oo ku dhaliilay in fikradda casriyeyntu ay tahay nooc gumaysi cusub (neo-colonialism) oo abuuraya ku tiirsanaan iyo dib u dhac ku yimaadda bulshooyinka ku dhaqan dunida saddexaad.

Waxaa jirtay iyaduna fikrad horumarineed oo ay hormuud ka ahayd Qaramada Midoobay, taasoo soo bilaabatay 1970 iyo wixii ka dambeeyey. Fikraddaas waxaa saldhig u ahaa daboolidda baahiyaha dadka iyo yaraynta faqriga (needs theory & poverty reduction). Laga soo bilaabo 1980-na, waxaa soo baxday fikrad horumarineed oo loo bixiyey suuqa xorta ah (free market approach), oo sidoo kale loo yaqaan is-afgaradkii ama heshiiskii Washington (Washington Consensus). Qorshahan, oo ay hormuud u ahaayeen waddamada reer galbeedka, waxaa fulinta barnaamijyadiisa loo xilsaaray hay'adaha Sanduuqa Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunka (IMF, WB).

Barnaamijyada Afrika laga fuliyey ee qorshahaas aad loogu xasuusto waxaa ka mid ahaa barnaamijkii dib-u-qaabaynta hay'adaha dawladda iyo siyaasadaha ay ku shaqeeyaan (Structural Adjustment), kaas oo lagu qasbay dalal badan oo Afrikaan ah in, si mucaawino loo siiyo, ay qaataan nidaamkaas. Hay'adaha dawladahaasna dib-u-qaabayn ayaa lagu sameeyey, shaqaale badanna waa la ruqseeyey. Wuxuu ahaa barnaamij aan ka turjumayn duruufaha gaarka ah ee Afrikaanka; sidaas darteed, waxaa la sheegaa in dhibaato badan ay ka soo gaartay shacbiga Afrika.

Marxaladahaas aan ka soo sheekaynay waa milicsi kooban oo ku saabsan marxaladihii iyo ujeeddooyinkii horumarinta caalamiga ahi soo martay tan iyo Dagaalkii Labaad ee Adduunka, inagoo tusaale ahaan u soo qaadanay wax yar oo kooban, maadaama aan qoraal yar lagu soo koobi karin. Hadda waxaa isbeddelay nidaamkii adduunku u shaqaynayey (global order), waxaana abuurmay nidaam cusub (new order) oo ay jilayaashu ku bateen (multi-polar system). Waagaas aan ka soo sheekaynay, adduunka waxaa ka jiray laba awoodood oo is-dheellitiraya (bi-polar system), oo ay kala hoggaaminayeen Maraykanka iyo Ruushka. Dabadeed, markii awooddii Midowgii Soofiyeeti meesha ka baxday, wuxuu adduunku isu beddelay nidaam awood hal dhinac ah (uni-polar system), oo Maraykanku ahaa awoodda keliya ee caalamka. Hadda se, adduunku wuxuu u sii siqayaa nidaam awoodo badan (multi-polar system) oo ay ka mid yihiin Ruushka, Maraykanka, Shiinaha iyo waddamo kale sida Turkiga, Hindiya iyo kuwo kale, halkaas oo ay sidoo kale ka abuurmeen awoodo goboleedyo tiro badan.

## GEEDI SOCODKA QORSHAHA HORUMARINTA SHANTA SANO EE PUNTLAND

Qorshaha horumarinta Puntland wuxuu soo bilowday 2007, markaas oo la sameeyey qorshihii horumarinta shanta sano ee kowaad, kaas oo lagu shaqaynayey ilaa 2011. Mawduuca uu xoogga saarayey wuxuu ahaa ka soo kabashada colaadaha iyo asaaska dawlad-dhiska (post-recovery and basic state building). Qorshihii labaad ayaa la sameeyey 2014 ilaa 2018, mawduuca uu xoogga saarayeyna wuxuu ahaa kobcinta dhaqaalaha iyo kaabayaasha dhaqaalaha (economic growth and infrastructure). Qorshihii saddexaad waxaa la sameeyey 2020 ilaa 2024, wuxuuna xoogga saarayey kobcin dhaqaale oo loo dhan yahay iyo adkaysiga bulshada (inclusive economic growth and resilience). Qorshihii afraad ayaa dhowaan la shaaciyey, wuxuuna ka bilaabanayaa 2026 kuna eg yahay 2029. Qorshahan wuxuu xoogga saarayaa isbeddelka dhaqaalaha iyo isku-tashiga (economic transformation and self-reliance), wuxuuna dhiirrigelinayaa maalgelinta gaarka loo leeyahay (private investment), ka faa'iidaysiga dhaqaalaha buluugga ah iyo dib-u-qaabaynta hay'adaha dawladda.

Dhammaan qorshayaasha aan kor ku soo sheegnay waxay u muuqdaan kuwo inta badan loo diyaariyey si loogu helo mucaawino dibadeed. Inkasta oo qorshaha afraad ee u dambeeya ay ka muuqato aragti ku salaysan isku-tashi, sida xoojinta maalgelinta gaarka loo leeyahay ee gudaha iyo in dawladdu qayb weyn ka qaadato kharashaadka horumarinta, haddana waxaa muuqata in miisaaniyadda 2026 la ansixiyey ka hor intaan qorshaha la shaacin, taas oo muujinaysa inaan labadu si buuxda isugu waafaqsanayn. Arrinka isku-tashiga ee ka muuqda qorshaha afraad waa mid soo dhoweyn mudan; hase yeeshee, hirgelintiisu waxay ku xirnaan doontaa sida uu qorshaha horumarineed uga muuqdo miisaaniyadda dawladda iyo sida ay u suuragasho fulintiisu.

Mida kale ee xusidda mudan ayaa ah in miisaaniyadda loo qoondeeyey fulinta qorshahan, sida ku cad qorshaha afraad, ay dhan tahay USD 1,783,875,579 (hal bilyan toddoba boqol sideetan iyo saddex milyan shan boqol toddobaatan iyo sagaal kun), taas oo macnaheedu yahay in sannadkii loo baahan yahay ku dhowaad USD 356,775,114.6 (saddex boqol konton iyo lix milyan, toddoba boqol toddobaatan iyo shan kun boqol iyo afar iyo toban doolar). Lacagtaas, sida qorshuhu tilmaamayo, waxay ka imaanaysaa Dawladda Puntland, ganacsiga gaarka loo leeyahay, qurbo-joogta, xawaaladaha, maalgelinta dibadeed (FDI), zakada iyo ugu dambayn saaxiibada caalamiga ah ee taageera Puntland. Hase yeeshee, qorshuhu si cad uma qeexayo boqolleyda dhinac kasta laga filayo inuu bixiyo, mana muuqato ballan-qaad rasmi ah oo ku saabsan sida lacagtaas loo heli doono.

## MUXUU KU SALAYSAN YAHAY QORSHAHA AFRAAD SHANTA SANO MA ISKU TASHI MISE MUCAAWINO DIBADEED?

Sida muuqata, dhaqaalaha adduunka oo sii xumaanaya, kan Soomaaliya oo xaalkiisu aad u sii liito, iyo Puntland oo ganacsato badan ay dhaqaalahoodii dibadda u saareen kuna maalgeliyeen meelo kale, lacagta sannadkii loo baahanyahay oo ka badan saddex boqol oo milyan waxay u muuqataa inaan si qoto dheer looga fiirsan. Haddii ujeeddada qorshuhu tahay isku-tashi, waxaa muuqata in aanay suurtagal ahayn in lacag intaas le'eg ay ka soo baxdo dawladdu iyo ganacsatada gudaha midkoodna.

Waxaadse mooddaa, sida qorshuhu u qoran yahay, inuu yahay qaab isku dhafan oo dhinac isku-tashi laga samaynayo, dhinaca kalena mucaawino dibadeed la rajaynayo. Iyadoo lacagta intaas le'eg oo ka badan dhowr boqol oo milyan sannadkii ay adag tahay in mucaawino dibadeed lagu helo, haddana bal aan u dayno waqtiga iyo sida uu qorshaha afraad ku dambayn doono mustaqbalka.

Ma jiraa dal horumar ku gaaray kaalmo dibadeed?

Qofkii akhriya buugga ay qortay gabadha Afrikaanka ah ee lagu magacaabo Dambisa Moyo wuxuu ka dheehanayaa inaysan jirin dal horumar ku gaaray kaalmo dibadeed oo keliya. Waxayna kula talisay waddamada Afrikaanka inay iska dhaafaan ku tiirsanaanta kaalmada dibadeed, kana xoogga saaraan maalgashiga gudaha iyo kan dibadda, iyagoo abuuraya jawi maalgashi oo suurtagal ka dhiga dhinacyada siyaasadda, amniga iyo sharciyadda. Khubaro kale ayaa iyaguna ku dooday in waddan uusan horumar samayn karin haddii uusan abuurin nidaam dawlad-wanaag ku dhisan, oo sharcigu sarreeyo, musuqmaasuqa lala dagaallamo, wax-soo-saarka dalka la xoojiyo, isla markaana la dhiso hay'ado dawladdeed oo karti leh oo awood u leh inay qabtaan shaqada laga sugayo, kana madax bannaan in dano gaar ah loo adeegsado. Sidaas awgeed, waxay aragtiyahooda ku soo ururiyeen saddex arrimood oo waaweyn: dawlad-wanaag (good governance), maalgelin (capital investment) iyo hay'ado dawladdeed oo karti leh loona siman yahay (capable and inclusive institutions).


## GABAGABO

Puntland iyo Soomaaliya labadaba, si horumar loo gaaro, waxaa lagama maarmaan ah in ku tiirsanaanta deeqaha dibadda si weyn loo yareeyo ama la joojiyo, beddelkeedana la qaato nidaam ku dhisan isku-tashi. Horumarku wuxuu ka bilowdaa dawlad-wanaag; dawlad-wanaagga, sida aan hore qormo uga qoray, guud ahaan waa hirgelinta sharciga, nidaamka isla xisaabtanka, la dagaallanka musuqmaasuqa noocyadiisa kala duwan, iyo in dawladnimada loogu adeego bulshada, ee aan laga adeegan.

Ugu dambayntii, haddii la rabo in horumar la sameeyo, waxaa lama huraan ah in la dhiso hay'ado dawladdeed oo karti leh, isla markaana u diyaarsan inay ka shaqeeyaan danta guud ee bulshada, ee aan cid gaar ah u adeegin (capable and inclusive institutions). Saddexdaas arrimood waa furaha horumarka dal, waana in la dhaqan geliyo si bulshadu horumar ugu tallaabsato.

**W/Q:** Ahmed Said Nur

# MIDNIMADA UMMADDA SOOMAALIYEED: TIIRKA KARAAMADA, IYO MUSTAQBALKA QARANKA



Dr. Maxamed Cali Faarax



Hordhac

Midnimadu waa tiirka ugu weyn ee ay ku dhismaan karaamada, xasilloonida, iyo horumarka ummad kasta. Ummad mideysan waxay awood u yeelataa inay ka adkaato caqabadaha, difaacato jiritaankeeda, isla markaana gaarto horumar waara. Marka dadku isku duubnaadaan, waxay wadaagaan himilo, hal-abuurnimo, iyo mas'uuliyad qaran.

Aristotle (384-322 BC) oo ahaa faylasuuf Giriig ah ayaa yiri: "Qofka keligiis noolaan karaa ama xoolo buu yahay ama Ilaah", wuxuu rumaysnaa in bini'aadamku yahay "xayawaan bulsho ah", oo u baahan midnimo iyo wada noolaansho; si uu u gaaro nolol wanaagsan. Ummad kala daadsan ma gaari karto caddaalad iyo horumar.

Sidoo kale Plato (427-347 BC) ayaa adkeeyey in bulsho midaysan ay ka dhalanayaan caddaalad iyo nidaam, haddii qof walba guto doorkiisa, lana wadaago himilo qaran, waxaa dhasha midnimo dhab ah oo ummadeed.

Roomaaniyiintii hore waxay qof kasta oo muwaadin ah oo gaara 20 sano ku khasbi jireen inuu ku dhaarto inuu ilaalinayo dalkiisa iyo xukuumaddiisa, waxayna la gali jireen ballan inuu marwalba u taagnaado difaaca dalkiisa.

Ibn Isxaaq oo ka mid ah ragga wax ka qoray Siirada Nebiga (SCW) ayaa ka faallooday sida ay Yuhuuddu u dhibsadeen wadajirka iyo midnimada reer Ansaar oo Islaamka ka hor col ahaa, dagaallo waaweynna ay dhexmareen oo uu ka mid ahaa dagaalkii la magac baxay "Bucaas". Yuhuuddu waxay u hawlgaleen inay Ansaarta isku diraan oo ay xasuusiyaan maalmihii adkaa ee laysla soo maray iyo dagaalladii dhexmaray, taasoo gaarsiisay inay hubka iskusoo gurtaan. Nebigu (SCW) markuu maqlay dhacdadaas, si degdeg ah ayuu uga hawlgalay, wuxuuna ku yiri: "Ma Dacwo Jaahili ah ayaad ku dhawaaqaysaan anoo idin dhex jooga, ka fogaada waa wax qarmuune", wuxuuna ku akhriyey Qowlka Alle:

"واعتصموا بحبل الله جميعاً ولا تفرقوا واذكروا نعمة الله عليكم إذ كنتم أعداء فألف بين قلوبكم فأصبحتم بنعمته إخواناً وكنتم على شفا حفرة من النار فأنقذكم منها كذلك يبين الله لكم آياته لعلكم تهتدون" (آل عمران: 103).

Alle wuxuu yiri: "Xarigga Alle qabsada dhammaantiin hana kala teginnina, xasuusta nicmada Alle iyadoo ay jirtay waqti aad cadow isku ahaydeen–aad dagaallamayseen-quluubtiinnana Alle iskusoo dumay oo aad sidaas walaalo ku noqoteen adinkoo naar qarka u saarnaa, Allena idinka badbaadiyey".

Waxaad halkaas ka garanaysaa in Yuhuuddu weligoodba ay ahaayeen fidno u joog, neceb midnimada ummadda ay la nool yihiin, markastana abuura khilaaf, nacayb iyo dagaallo si ay danahooda ay u gaaraan, awoodda bulshada ay ku dhex nool yihiinna u wiiqaan, cidda Yuhuudda soo dhawaysataana waa cid aan taariikhda iyo Siirada Nebiga (SCW) daalacan, xog fiicanna aan ka hayn dhaqanka Yuhuudda. Waxaa markhaati kuugu filan hab-dhaqankooda maanta ay adduunka la joogaan, siday uga shaqeeyaan hurinta colaadaha, isku dirka, kala dilka iyo kala fogaynta bulshada Islaamka ah ee ay diintu walaalaysay.

Midnimadu waa dariiqa lagu gaaro dawladnimo, madaxbannaani iyo qarannimo dhammaystiran; waxaa habboon in ummaddu ku dadaasho inay noqoto mid sharaf ku nool, dhiirran, maskax furan, jecel dhaqanka wanaagsan, xorriyadda, una hoggaansata oo ixtiraamta shuruucda iyo qawaaniinta dalka u deggan.

Abuu Camar Ibn Calaa (689-770 Miilaadiyada) oo ka mid ahaa culimadii muslimiintu wuxuu yiri: "waxaa daliil u ah in qofku yahay qof xor ah oo dun wanaagsan u hilowga dalkiisa, iyo jacaylka ummaddiisa; isagoo marwlaba si gaar ah u xasuusta waqtigii tegey iyo goobihii uu carruurnimada kusoo qaatay".

Ibn Khadun (1332-1406 Miilaadiyada) oo ahaa taariikhyahan ayaa isna si qoto dheer uga hadlay "Casabiyada" oo ah isku-duubni bulsho. Wuxuuna sheegay in dawlad ama ummad aan lahayn Casabiyad xooggan inay burburto.

## MIDNIMADU WAA ASAASKA JIRITAANKA QARANNIMADA

Erayn "Qaran" wuxuu tilmaamayaa bulsho meel kuwada nool oo dan-wadaag ah, isuguna xiran ama ay ka dhaxayso baadi-sooc u gaar ah- sida: dhaqan, taariikh, xeerar, xilal, iyo dhaqaale. Waxa ugu wayn oo ay bulshadu ku dhowran karto qarannimadeeda waa midnimada iyo wadajirka; iyadoo la wada ilaalishanayo waxa la wadaago oo uu ugu horreeyo dalka lagu dhex nool yahay, diinta la wada rumaysanyahay, Calanka buluugga ah oo dhexda xiddiga shan geesoodka ah ku leh iyo dawladnimada la wada harsanayo.

Taariikhda qarannimada Soomaaliyeed haddii aad milicsato, waxaa kuu soo baxaya inaan bulshada Soomaalidu wada ilaashan waxa ka dhexeeya oo qarannimadoodu u taagan, dalkiibaa baylah ah oo

dhinac walba cadow kasoo galay, calankiibaa meel layska dhigay oo la dayacay oo cid walbaa mid u gaar ah meel ka taagatay, diintiibaan loo qiiroon oo dadka in badan oo ka mid ah aan agtooda ku waynayn macno badanna ugu fadhiyin.

Haddaba, waxa ku soo baxaya markaad taariikhda Soomaalida daalacato inaysan ku guulaysan inay dhistaan qaran-ummadda midaysan, oo isku duuban, oo isku dan ah.

## TAARIIKHDA SOOMAALIDA IYO HALGAN MIDNIMO

Dadka Soomaalidu waa dad wadaaga isir, diin, af iyo dhaqan intaba; waana tiirarka inta badan xoojiya udub-dhexaadkana u ah midnimada iyo wadajirka ummadda; sidaas oo ay tahay ayaa haddana waxaad arkaysaa inay kala qoqobanyihiin, is khilaafsanyihiin, is colaadinayaaan, dawladnimadiina ku heshiin la'yihiin. Waana arrin khilaafsan waxa adduunka ka jira; iyadoo inta badan khilaafka bulshooyinku uu salka ku hayo: diin, luqad, isir iyo khilaaf dhuleed.

Soomaalidu waa dad ay isku-xiran oo tol ah, wada noolaana muddo qarniyaal ah, waxayna kusii nagaadeen habkaas xitaa intii ay jirtay dawlad Soomaaliyeed. Dhaqanka sidaas ah waxay kala mid ahaayeen bulshooyinkii duugga ahaa, kuwaasoo si weyn ugasoo horjeeday keli ahaanta, isla sidaasay bulshada Soomaaliyeed u diiday gooni ahaanta, qalana ka muujiyeen, waana tay ugu yeeri jireen "qoys gaar", hadduu reerku ka durko duddo meel degtay.

Si kasta ha ahaatee; marwalba waxaa muuqanaya in qofka Soomaaliga ahi uu ku tiirsanaa qolo, walina ku tiirsanyahay xilligan hadda la joogo. Sayid Maxamed iyo rag badan oo waddaniyiin ahi waxay door-bidayeen qof dawlad ku tiirsan oo aan ku tiirsanayn qolo. Si taas loo helana waxay u baahantahay waqti iyo duruufaha oo isbeddela oo markaas bulshada Soomaaliyeed isdhalan rogto.

Halgamayaasha Soomaaliyeed ee caanka ku ahaa waddan jacaylka iyo gaala nacaybka waxaa ka mid ahaa Sayid Maxamed Cabdille Xassan, wuxuuna dhowr iyo labaatan sano u dagaallamayay difaaca diinta iyo la dagaallanka gumaystihii Ingiriiska iyo Soomaalidii la socotay ee kaba-qaadka u ahayd, Sayidka mowqifkiisu waa uu caddaa lagasoo bilaabo maalintii uu Berbera kasoo dagay oo canshuurta gaalka Ingiriiska ahi weydiiyay ilaa uu ku geeriyooday Degmada Iimey, maansadii ugu dambaysay ee uu tiriyay ayaad ka dheehan kartaa hal-adaygiisa iyo gaala nacaybkiisa, isagoo yiri:

*Gaalada dirayska leh anaan daababdda u qabane*

*Anaa diiday dagal inaan la galo daallin ii colehe*

*Dalka ma lihid anigaa ku idhi, doora weynaha e*

*Anaa diiday nabaddiisa aan, daacad noqonayne*

*Anaa diiday deeqdiisa ay, naari dabataale*

*Dahabkii u waday waanigii, daadiyee qubaye*

*Dagaalkiisa anigow xishoo, daalib ku ahaaye*

*Durdurrada Fardowsaad anaa, doortay oo rabaye*

*Anaan labada daarood tan hore, darajo moodayne*

*Anaa diiday gaal daacufle ah, dabagalkiiye*

*Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline*

Xilligii gobonnimo-doonku wuxuu ku suntanaa in dadka Soomaalida oo ay hormuud u ahaayeen ururradii gobonnimo-doonka ahaa ay midnimo ku baadi goobayeen madaxbannaani iyo in dadka Soomaalidu aayahooda ka tashadaan, gumaysigana dalkooda ka xoreeyaan. Ururkii dhallinyarada ee SYL ayaa horseed u ahaa halganka xornimo raadiska ah oo ay Soomaalida meel kasta oo ay ku noolaayeen kuwada baraarugeen, waxa koowaad oo Soomaalida guusha u sahlaynayna wuxuu ahaa midnimadii iyo wadajirkii ay muujiyeen; iyagoo si aan kala har lahayn uga qayb qaatay halganka dalka looga saarayay gumaysiga Talyaaniga iyo Ingiriiska; kaasoo kusoo gabagaboobay inay labadii gobol ee Waqooyiga iyo Koofurtu xornimo ku midoobaan 1-dii Luuliyo 1960-kii.

Inkastoo midnimadu horseedday xornimo, haddana Soomaalidu ma unkin dawladnimo sal-adag iyo hay'ado ka shaqeeya hirgelinta nidaamka dawliga ah oo dalka horumarka gaarsiiya, bulshadana ku jiheeya inay dalkooda ilaashaadaan. Iskabadaayoo; waxaa dib loosoo nooleeyey qabyaaladdii iyo qolo-qoladii, eexdii, musuqii iyo nin jeclaysigii, taasoo sababtay burburkii dawladnimada iyo qarannimadii Soomaaliyeed ee halganka dheer loosoo galay.

## GUNAANAD IYO GABAGABO

Midnimadu waa geed harwayn, waan wasiilada lagu ilaaliyo qarannimada ummadda, dadka Soomaalidu waxay dayaceen wixii ka dhexeeyey oo ah dalka, calanka iyo dawladnimada, waxayna ka doorbideen burbur iyo haantaa-wilif, iyo inay carruurtoodu badaha ku dhammaato dhul shisheeyana waxaysan mudnayn kala kulmaan. Sharafta bulshadu waa midnimada iyo wadajirka iyo in lagu heshiiyo dawlad loo dhanyahay oo leh hay'ado wax ku ool ah oo u adeega bulshada, ilaaliya qarannimada, la dagaallama musuqa, eexda iyo nin jeclaysiga.

Markay Soomaalidu qarannimadoodii dayaceen, waxaa baylah noqday dalkoodii, waxaa burburay wixii bulshada isku hayay oo ay wada ilaashanayeen; taasoo keentay in Israa'iil ay 26-kii bishii December u aqoonsato Somaliland dal madax-bannaan, falkaas oo ah mid lagu burburinayo dawladda Soomaaliya ee tabarta yar, awoodna aan u lahayn inay difaacdo dhulkeeda, midnmadeeda dhuleed iyo madax-bannaanideeda siyaasadeedna ilaashato haddii aan adduunku u soo gurman oo garab istaagin sida marar badan dhacday.

**W/Q:** xxxx

## MARAAJIC (REFERENCES)


1. Aristotle. Politics. Translated by Benjamin Jowett. Oxford University Press.
2. Plato. The Republic. Translated by G.M.A. Grube. Hackett Publishing Company.
3. Ibn Khaldun. Al-Muqaddimah (The Introduction to History). Translated by Franz Rosenthal. Princeton University Press, 1967.
4. Ibn Ishaq. Sirat Rasul Allah (The Life of the Prophet Muhammad). Translated by A. Guillaume. Oxford University Press, 1955.
5. Daa'uud, Dhaliisha Dhaqanka Soomaaliyeed, 2010.
6. Aw-Aden, waayihii Soomaaliya: Bogag ka mid ah taariikhda Soomaaliyeed
7. Qur'an al-Karim – Surah Aal-Imran (3:103).




# MAXAA SABABAY SOO KABASHO LA' AANTA QARANKII SOOMAALIYEED EE KUFAY OO KALA YAACAY?



Cabdiraxmaan Shiikhdoon



Xigashada Sawirka: AI

*"Danbi ku hadli maayo'e ma'arag dawladdaan rabaye "Qaasim*

# HORDHAC

Dhibaatada bururka dawladuhu waa mid dunida si joogta ah ugu dhacda, soona martay dalal badan oo maanta ka soo kabtay. Arrimaha ku saabsan burburka dawaladaha, labo qodob ayaa dhigaalka taariikhda ka galay, kuwaas oo wax laga baran karo. Tan hore, waa sida ay dawladaha burburay u soo kabtaan iyo waxyaabaha sababa burburkooda. Soomaaliya oo ka mid ah dawlada burburay waxa laga bartay sida ay jabhadaha ku dhisan qabiil ay u dumiyaan qaran dhisan, hase yeeshee Soomaaliya oo loo soo qabtay 14 shir oo dib-u- heeshiisiin ah, weli lagama baran cashar ku saabsan soo kabashada dawladaha burburay, marka laga reebo casharada laga bartay Somaliland iyo Puntland ee ku saabsan maamulka gun-ka-soo-unuga ah. Labo arrimood ayaa keenay in ay soo kaban waydo Soomaaliya oo maanta kaalinta koowaad kaga jirta dawladaha nugul (fragile states) oo dhowr iyo toban sano lahayd dawlad ka soo gudubtay ku-meelgaar. Tan koowaad waa is-haysiga siyaasiyiinta oo dalka geliyey xaalad degnaansho la'aan ah iyo faragelinta shisheeyaha oo ku daaban hogaamiyaasha Soomaaliya"Gudiney imaadan goyseen haduu san gabalkey kugu jirin". In kasta oo ay jiraan waxyaabo badan oo ka qabsoomay qaran dhiska Soomaaliya, haddana weli lagama gaarin horukac badan oo la qaban karay. Arrintaas waxay muujinaysaa in aan weli la helin hogaamiyihii horseedka u noqon lahaa in laga baxo nugaylka dawladnimada. Weli arrintu waxa ay maraysa halkii uu Qaasim ka gabyey sannadkii 1964-tii oo uu yiri: "Danbi ku hadli maayo'e ma'arag dawladdaan rabaye". Waxa jira dawlado badan oo burburay intii ay Soomaaliya burburka ku jirtay, haddana maanta safka hore kaga jira dawlad-wanaaga, deganaanta iyo kobaca dhaqaalaha.

Qoraalkaan waxa uu si kooban uga hadalayaa sabaha saldhiga u ah soo-kabasho la'aanta qarankii Soomaaliyeed iyo tusaalooyinka ku saabsan talaabooyinka ay qaadeen dawladaha soo kabtay qaarkood.

# MAXAY TAHAY NUGLAANTA DAWLADNIMADU?

Nugaylka dawladnimada waxa lagu qimeeyaa 12 qodob oo ku saabsan arrimaha bulshada, dhaqaalaha, nabadgelyada, iyo siyaasadda, kuwaas oo muujinaya sida ay dalalka dunidu ugu kala horeeyaan nugaylka dawladnimada. Si kooban, dalalka nugul waa dalalka aysan hay'adaha dawladoodu awood u lahayn fulinta sharciga, maamulida khayraadka, bixinta adeegyada bulshada iyo xakamaynta xuduudaha dalka. Sidoo kale, kalsoonida ay bushadu ku qabto dawlada oo yar, colaadaha iyo dambiyada oo si fudud uga dhaca, dhaqaalaha oo liita, iyo maamulka oo aan xakamayn karin dhibaatooyinka soo food saara.

Qiimeynta la sameeyey sannadkii 2024-tii ee ku saabsanay nugaylka dawladnimada (fragile states) oo lagu sameeyey 179 dal, waxa ay Soomaaliya (111.3) ka gashay kaalinta ugu saraysa, iyaga oo ay ku soo xigaan Suudaan( 109.3) iyo Koonfurta Suudaan (109.0). Dhibcaha qiimayntu oo u dhaxeeyaan 0 ilaa 120, wixii ka sareeya 90 ilaa 120, waxaa lagu tilmaamaa in ay yihiin dawladaha la daala-dhacaya khatarta nugaylka dawladnimada, taas oo ay Soomaaliya safka hore kaga jirto.

# SIDOO LOOGA SOO KABTAA NUGAYLKA DAWLADNIMADA?

Dalal badan oo dunida ka mid ah ayaa ka soo kabtay burburka iyo nugaylka dawladnimada, kuwaas oo dhammaantood helay hogaamiyaal hami sare leh oo horseed u noqday ka soo kabashada nugelyka dawladnima. Dawladaha Jarmalka iyo Jabaan ayaa tuusaale ah dawladaha sida dhaqsaha ah ugu soo kabtay burburkii ka soo gaaray dagaalkii labaad ee aduunka, kuwaas oo xooga saaray kobcinta dhaqaalaha oo fure u ah ka soo kabashada nugaylka dawladnimada. Dawladaha dhowaan burburay ee sida deg deg ah uga soo kabtay burburkii dawladnimada, waxaa tusaale wanaagsan u ah dalka Rwanda, oo dad badan oo Soomaaliyeed la geeyey si ay wax uga soo bartaan. Waxa ka dhacay Rwanda xasuuq balaaran oo ay dad kor u dhaafaya hal milyan ay ku naf waayeen muddo saddex bilood ah. Muddo kooban ayay Rwanda kaga soo kabatay burburkii dawladnimada, maanta waxa ay ku jirtaa dalalka degen ee sameeyey kobaca dhaqaaalaha iyo dawlad wanaaga. Qiimeynta nugaylka dawladnimada waxa ay kaga jirtaa kaalinta 46-aad (2024). Waxayaabaha horseedka u noqday soo kabashada dalka Rwanda waxa ugu horeeya hogaamiyaha dalka qabtay oo ka shaqeeyey dhisida hay'adaha dawlada, midaynta bulshada, kobaca dhaqaalaha, la-dagaalanka musuqa, iyo abuurista kalsoonida bulshada, kuwaas oo dhammaantood ka qayb qaadanaya deganaanshaha dawladnimada. Arrinta kale ee muhiimka ah, waxa ay ahayd dib-u-heshiisiinta bulshada ee ku salaysnayd xalka geedka hoostiisa lagu gaaro iyo dhaqanka bulshada oo aan ahayn arrinta dibada laga soo waariday, laguna heshiisiinaayo bulshda, oo aan ahayn

arrin u dhexaysa hogaamiyaasha siyaasadda. Arrinta taariikhdu qortay waa Rwanda oo dalka aan bad lahayn oo dhul ahaan aad u yar (in ka yar 5% dulka Soomaaliya), haddana sameeyay kobac dhaqaale oo qayb ka qaatay deganaanshada ka jira dalka Rwanda. Arrintu waxa ay u muuqataa:" Caqligii wanaagsani, itaal inuu ka roon yahay, bale eegoo, u fiirsada!".

## SABABAHA KEENAY SOO KABASHO LA'AANTA BURBURKII DAWLADA SOOMAALIYA

Sida in badan la qorey, hoggaanku waa arrinta ugu muhiimsan ee keenta isbedelka iyo ka soo kabashada burburka dawladaha soo gaartay. Sidaas darteed, sababta ugu weyn ee ay Soomaaliya u soo kaban weyday waa helitaan la'aanta hoggaan hormuud u noqda soo kabashada dawladnimada, kaas oo diyaariya barnaamij cad oo uu dalku kaga soo kaban karo burburka iyo kala qobqobnaanta ka jirta. Tan iyo curashadii Jamhuuriyada saddexaad ee Soomaaliya ee lagu soo dhisay dalka Jabuuti, waxa jiray khilaaf xoogaan oo u dhexeeya madaxda la doorto iyo hogaamiyaasha siyaasadda ee dalka ka jira. Sidoo kale waxa jirta khilaaf inta badan ka dhex aloosan hogaanka sare ee dalka, kaas oo saldhig u ah degenaansho la'aanta siyaasada dalka.

Dawladii Cabdiqaasim, waxaa si xoogan uga horyimi hogaamiye kooxeedyada ka jiray Muqdisho iyo kuwo kale, oo ay taageeraysay dawlada Itoobiya, kaas oo sababay in ay dawladaasi fadhiid noqoto. Sidoo kale, waxaa jiray khilaaf xoogan oo u dhexeeyey madaxweynaha iyo raysul-wasaare Cali Khaliif Galayr. Dawladii dalka Kenya lagu soo dhisay ayaan iyana ka nabad gelin, khilaafyada ka imanyey hogaamiye kooxyada iyo khilaafka hogaanka dawlada u dhexeeya, tusaale ahaan, khilaadkii ugu horeeyey ee ay kula qaybsameen Shariif Xasan Shiikh Aadan (guddoomiyihii baarlamaanka) iyo Cabdulaahi Yusuf Axmed. Sidoo kale, waxaa jiray dagaal xoogan oo u dhexeeyey maxkamada iyo khilaafkii raysul wasaare, Nuur Xasan Xuseen (Nuur Cade) iyo Cabdullahi Yuusuf Axmed, oo ugu dambayntii keenay in Cabdulaahi Yuusuf lagu cadaaadiyo in uu xilka ka dego. Dawladii Shariif Shiikh Axmed, iyana waxa ay la kulantay mid la mid ah khilaafyadii iyo dagaalkii uu la kulmay Cabdulaahi Yuusuf. Hase yeeshee, dawladnimu waxa ay gaartay in Muqdisho lagu shaqeeyo, in kasta oo ay jirtay cabsi badan iyo dhibaatooyin ay qabeen dadka dawlada u shaqeeya. Dawladii Xasan Shiikh Maxamuud ee hore, waxa soo if-baxay khilaaf u dhexeeya dawlada faderalka ah iyo dawladaha xubnaha ka ah, kaas oo ilaa iyo maanta taagan. Khilaafkan waxaa la kulmay dawladii Maxamed Cabdullaahi Farmaajo iyo dawlada hadda jirta ee Xasan Shiikh uu madaxweynaha ka yahay.

Muranka ka dhasha hanaanka doorashada ayaa inta badan dhaliya khilaaf xoogan iyo dagaalo ay isku gacan saaraan siyaasiyiinta ku hardamaya madaxtinimada dalka ama dawlad goboleeyada, kuwaas oo ka dhacay Muqdisho, Garoowe, Baydhabo, iyo Kismaayo. Isbedelka hogaanka oo aan ku iman si degan, ayaa ka mid ah waxyaabaha keena nugaylka dawladnimada, iyo soo kabasha la'aanta dawladnimada ee dalka ka jirta. Dhinaca kale, waxaa dood ka jirtaa midnimada dawlad-goboleeyada, ka dhex jirta, tusaale, ahaan, gobolka Gedo iyo dawlad-goboleedka Jubaland ee ay ka mid tahay, waxaa ka jira muran iyo dagaalo sababay dhibaato badan iyo degenaansho la'aan ka jirta dalka. Sidoo kale, waxa guux ka dhex jiraa dawlad-goboleedyada dhexdooda, taas oo ka qayb-qaadanaysa habacsanaanta maamulada jira. Waxa kale oo jira colaado soo noqnoqday oo ka dhex jira beelaha dega hal maamul-goboleed ama labo maamul-goboleed oo deris ah. Dhibaatooyinkaas oo dhan waxa ay muujinayaa sida aan weli loo midayn bulshada iyo sida aan looga soo kaban burburkii dalka gaaray, iyada oo ay Soomaaliya ahayd dal midaysan.

Faragelinta shisheeye oo uusan daahu ku rognayn ayaa qayb libaax leh ku leh soo kabashada la'aanta dalka, in kasta oo ay jiraan dhaqaale badan oo ay dunidu ugu deeqday Soomaaliya. Haddana dhaqaalahaasi ma horseedin in horumar laga sameeyo nugaylka dawladnimada. Dhowaan waxa ay dawlada Soomaaliya xiriirkii u jartay dalka Imaaraadka Cartabta oo lagu eedeey in uu ka qayb qaatay kala qaybinta dalka. Waxa kale oo jira damac ay dalalka shisheeye ka leeyihiin dhulka iyo khayraadka ku duugan dalka Soomaaliya. Dalalka faragelinta ku leh Soomaaliya aayaan meel ka soo wada jeedin, taas oo keentay in dalka hadba dhinac u jeesto.

# GABAGABO

Ugu dambayntii waa arrin u baahan in dood laga furo sababta ay Soomaaliya u kaban la'dahay 35 sanno ka dib, iyada oo loo sameeyey 14 dib-u-heshiisiineed. In kasta oo qoraalkani si kooban u sheegay sababo jira, haddana, waa lagama maarmaan in la sameeyo cilmi-baaris iyo dood qoto dheer si xal loo helo ka soo kabashada nugaylka dawladnimada iyo duruufaha ku gedaaman dalka. Deganaansho la'aanta siyaasada iyo muranka aan xalka laga gaarin ee doorashooyinka, musuqmaasuqa, colaadaha ka jira beelaha ood-wadaagta ah iyo faragelinta shisheeye ayaa ah arrimaha uu qoraalkani u tilmaamay sababaha ay Soomaaliya u soo kaban la'dahay. Dhaqanka qabyaalada ee huriya colaadaha ayaa ah waxyaabaha wiiqayda midnimda iyo nabadgelyada dalka. Haddii la helo midnimada maamulka, waxa ay sahli kartaa inay dawladu gacanta ku dhigto dhamaan gobolada dalka. In wax laga barto dalalka ka soo kabtay colaadaha iyo burburka dawladnimadu waa arrin loo baahanyahay, weliba dawladaha aan duruufo badan wadaango. Soomaalidu waxa ay haysataa kansho fara badan oo xoojinaya midnimada sida diinta, dhaqanka, afka, dubka iyo kuwo kale.

**W.Q.** Cabdiraxmaan Shiikhdoon

Sheikhdon4@yahoo.com



# MAXAAN GALALKA DUUGAA!



Maxamuud Cali Aadan
(Hoorri)



Xigashada Sawirka: AI

Maraxa keliya ee laga dhaxlay burburkii Dowladdii Dhexe ee Soomaaliyeed ayaa ah siyaasi beenlow ah, ka arradan dhaqanka wanaagsan, ka qaawan dadnimada, u janjeera boobka, ku badhaadha boolida, ku mushaaxa gaajaysiinta shacabka iyo jaahwareerinta jiilka cusub. Sidoo kale, waxa hubaal ah, in la dhaxlay wadaad-xume arxan daran, ka macaasha dhiigga dadweynaha, ku hubaysan kitaab uu moogyahay waxa ku qoran balaashiisa, muuqaal ahaanna waxa uu eg yahay dhidar ama caalle meel waraq ah ido goosmay ku xasuuqaya.

Maansadani, waxa ay ka hadleysaa arrimo isbarkan oo isasuran. Waxa ay tilmaan iyo qaabayn ka bixineysaa waayaha natiijada laga dhaxlay burburkii lagu waayey dadnimadii iyo dunwanaaggii astaanta iyo sowraca u ahaa qofka Soomaaliga ah. Qaran-jabkii iyo jidbadii qabiilka miyaan laga dhaxlin hurgumo iyo hoog aan idlaanayn? Miyaan laga dhamin milil iyo sun? Miyaan laga cabbin darka qabyaaladda iyo hayb-soocidda ku dhisan caqlixumada iyo maanyarida? Tagtadii miyaan loo hiloobin iyo wixii la ahaa waa? Taaganta miyaan laga ashahaadan iyo afarjeeblayaasha? Timaatada miyaan quus iyo qalbi-jab looga fadhiyin? Maansada "MAXAAN GALALKA DUUGAA" waxa ay soo baxday 10, Ogoosto 2025, anigoo jooga caasumadda dalka – Muqdisho. Waxa ayna tidhi;

*******

*Maxaan galalka duugaa*
*Dadka been u sheegaa*
*Dowladdii kacaankiyo*
*Diricii dalka u kacay*
*Ducaqabe Siyaadkii*
*Kolba dacar ka mariyaa*
*Danjiraha wax baariyo*
*Duryaadkan ogoonta ah.*
*Maxaan daar kharaabada*
*Damiirkayga oo guran*
*Dubaaqayga oo maran*
*Dundumooyin moodoo*
*Dusha sare ka daawaday.*
*Maxaa duub la ii xidhay*
*Dar Allee shacbiga ba'ay*
*Dabka dami yidhaahdeen*
*Anigoon digiigaxan*
*Duul ii mashxaradeen.*
*Maxan ubad daleel waray*
*Duullaan abaabuley*
*Dermaday ku ladayeen*
*Duhur weerar geliyoo*
*Dusha sare ka daawaday.*
*Maxaan dayrka qoyskiyo*
*Duddadaan ku noolahay*
*Duul igu ammaaneen*
*Dabadeed ismahadshoo*
*Digtoorradu ka yaabeen.*
*Maxaan daallin weyn ahay*
*Maxaan deris xigaalo ah*
*Damiirkooda kala diley*
*Dabadeed ka baayacay*
*Diiratada qaxootiga*
*Inay dayr u seestaan*
*Dawarsiga ku barayaan.*

*******

*Maxaan daw abaareed*
*Garyradaaca duunyada*
*Digadooda uga raray*
*Dabadeedna xooroo*
*Goosan iyo dabaylnuug*
*Daayeerku iga cunay.*
*Muxuu doqon garaad li'i*
*Dibin-daabyo ila helay*
*Anna aan darka u galay*
*Dabdeed hilmaamoo*
*Diiwaanka lagu daray*
*Inaan ahay dayuuskii*
*Sida dulinka ugu fiday*
*Maxaan door ismoodoo*

Doqon reero  keeneen
Digtoor ugu cimaamday
Dabadeed majarihiyo
Ka dalaabay waayaha
Dadku iga ducaysteen.
Maxaan derin la jiifsaday
Doobbiro nin kale dhalay
Dantaydii ku laayacay
Dabadeed cirrooboo
Oday daaley lay yidhi.

*******

Maxaan daabay godinkay
Gunta damalka gooyoo
Daraygiyo higloba jaray
Ku daldalay dameeraha
Dumar bacadka uga tegey
Anna doollar urursaday.
Maxaan ahay Ducaalow
Denbi loo cimaamaday
Dadku weli u haystaan
Daliil waxan cuskanayaa
Dooxatada qabiilkiyo
Simji-dhaanka duubka leh.
Maxan dogobyo shidayaa
Daacuun wax laayiyo
Duumo aan wax reebayn
Duufaan ku rarayaa
Dadweynaha saboolka ah
Qarax daafta ugu xidhay
Markuu waagu daalacay
Duugtii ka qaybgalay
Anigoo dibboro weyn
Deyiboow la leeyahay.


































**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG